



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 21

Taariikh: 27/06/2016

SHARCIGA XANAANADA XOOLAHA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Warqadda ansaxinta ee Golaha Shacabka Lr. 1302/3/1/9/16 ee soo Baxday 06/06/2016

MARKUU TIXGELIYAY: Inay muhiim in loo soo saaro sharci habaynayo xanaanada Xoolaha bacadamaa ay xoolaha qayb wayn ka yahiin kobcinta dhaqaalaha Dalka

Waxuu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1

Laga bilaabo markii uu Madaxwaynaha saxiixo, waxaa la oggolaaday lana meelmariyay Sharciga Xanaanada Xoolaha.

Qodobka. 2aad

Waxaa khasab ku ah muwaadan kasto ee jooga gudaha iyo dibadda inuu ilaaliyo Sharcigaan.

Qodobka 3aad

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

MUQDISHO 27/06/2016



Madaxwaynaha J. F.S
Xasan Sheekh Maxamuud



Ref: 1302/3/1/9/16:الرقم

Mogadishu, 6th June 2016 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Hanti-Dhowrka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Guddiga Beeraha, Horumarinta Reer Miyiga, Xoolaha iyo Kheyraadka Badda
L/H. Golaha Shacabka

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/. Golaha Shacabka.

Og: Agaasimaha Waaxda Shuruucda
L/H. Golaha Shacabka

Ujeedo: Ansixinta Sharciga Xanaanada Xoolaha


M.ne Madaxweyne;


Waxaan kugu wargelinayaa inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Xanaanada Xoolaha oo halkan ku lifaaqan, wuxuuna Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee Fadhigiisii 14aad ee 6^{da} Juun 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansixiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 150 (Boqol iyo Konton).
- Xildhibaan diidey: 0
- Xildhibaan ka aamustay 3 (Saddex Xildhibaan).

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddoontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.


M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawbar"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



MJ/AM

Tell: +252 612224442/ +252 615577472


E-mail: speaker@sfp.so

Website: www.sfp.so

ANSIXINTA SHARCIGA XANAANADA XOOLAHA.

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 153: Oggol (150) Diidmo (0) ka aamustay (3)




Saxiix: M. ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 6th June 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Jeylaani Nuur likar




Taariikh: 6th June 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS

Saxiix: M. ne Mahad Cabdalla Cawad

Taariikh: 6th June 2016





Reff: X/G/G/B/H/X/KH/B/133/___25___/04/2016

Tr. 25 April, 2016

Akhrinta 3aad ee Hindise-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha

Loj. Guud
Holagu soo
dar
asendada
25/4/16
24/4/16

Hindsie-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha Guddiga wuxuu soo gaaray maalintii akhrinta kowaad uu marey oo Wasiirka Wasaaradda ka hor akhriyey Golaha, warqadda Tirsigeedu yahay 1120/02/2016, ka soo gaartey Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka 01/02/2016, Guddiga waxay ka fariisteen taariikhdu markey ahayd 03/02/2016, waxay is la garteen in la soo akhriyo guud ahaan la isku keeno wax alle wixii lagu soo arko oo ka beddelid iyo ku daris u baahan, akhrinta labaad waxaan hortiina keeney 10/02/2016.

Hindise-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha waxuu ka koopanyahay Tusmo, Gogol dhig, Hordhac iyo 14 Cutub, Cutub kastana waxuu leeyahay Qoddoba dhowr ah, waxaan ku kordhiney qoddobka 5.1.1/1, oo ah ilaalinta xaquuqda xoolaha oo tilmaamaya sida loo raro iyo sida loo la dhaqmo marka lagu shaqeysanaayo. labo qoddob ee lagu kordhiyey oo kala ah G iyo H., waxaa kale lagu darey qoddobka 7.1 xarafka 4.

Guddiga waxuu aad culeys u saarey Qoddobada sharciga ah, waxuu wax ka beddelid, saxid ereyo ama kordhin ku sameyey qoddobo badan, waxaana ka mid ah:-

1. (g) waxaa lagu daray **dalka**. waxuu u qornaa :baarista iyo shahaado -siinta xoolaha iyo oonta xoolaha oo laga dhoofinaayo ama la soo gelinayo dalka si waafaqsan shuruucda caalamka, waxaan ka dhigney is waafaqsan sharuucda dalka iyo caalamka u degsan.
2. Qod 2.2.2 xarafka (b) waxaan ku kordhiney "**marka ay ka helaan ogolaasho wasiirka**". waxuu u qornaa: Soo dejinta, qaybinta, keeydinta iyo hal gadida dawooyinka xoolaha, iyo qalabka shaqada .

Guddiga asagoo eegayo wax ku kordhintii xildhibaanada iyo talooyinkooda waxey is la qaateen in loo daayo sidii hore ugu qornaa ereyada farsamada ku dhisan ee caalimiga ahi, sida karakas, quarantin iyo waxii la mid ahi ee ereyga veterineryga ah..

sido kale meesha uu sharciga qoraayey wasiirka oo aan ku bedelney wasaarada xanaanada, markey xildhibaanada ay soo jeediyeen ha loo daayo wasiirka. ayaduna waan qaadane

3. Qod 2.3.4 ereyga **uruursan yahiin** waxaan u bedelney "**ay xubno ka yahiin**".
4. Qod 4.7.6 waxaa laga saarey" **waxaa kaloo amar ku bixin karaa in la dilo eeyaha meel kasto ay joogaan**".
5. Qod 5.1.1/1xarafka (a) waxaa laga saarey " **haddii u san jirin sabab maan gal ah**", isla qodobkaa waxaa laga saarey" **ilaa heer uu baaba'o neefka sabab la**
6. Qod 7.1 waxaa lagu kordhiyey nabarka 4 " **xoolaha marka la saaraayo gaadiidka waa in lagu raraa goobo farsameysan looguna talo galey, si loo ilaaliyo xaquuqda xayawaan ka**".
7. Qod 9.1 waxuu ka hadlayaa **dhaqaatiirta aan dowliga ahayn**, waxuuna u kala saarayaa sharciga dhaqaatiirta dan gaar iyo kuwo dan guud guddiga iyo golaha waxey isku raaceen meelkasto uu kaga qoran yahay sharcigani labada nooc ee **dhaqaatiirta dan guud iyo dhaqaatir dan gaar**, in loo isticmaalo kaliya **dhaqaatiirta dowliga ah iyo dhaqaatiirta aan dowliga aheen**.
8. Qod 10.2.3/ 1 . **waxaa ku qornaa in la cusboonaysiiyo sannad kii mar**.
waxaan ku bedelney **in la canshuuro sanadkii mar**.
isla qodobkaa/2. waxaa lagu kordhiyey hadduusan canshuurin sanadka ma keeni karo wax kasto ku saabsan sharciga.

15.qod 14.2.1 shuruudaha shirgudoonka la doonayo ee guddiga dhaqaatiirta, nambarkiisa 2. dada soo weydiisanayo waa in uu ahaadaa , meeshii aheed 40--75 waxaan ka dhiginey 35 --60 jir .

nabarkiisa 3. waa in uu leeyahay khibrad meeshii ay aheed 15 sano waxaan ka dhigney 5 sano.

16.Qod 14.2.2 xarafka a) doorashada gudoomiyaha golaha waxay u qorneed: Xubin-sharafeed uu soo magacaabay Wasiirka kaas oo noqonaaya shir guddoonka guddiga doorashada, waxaan ku bedelney guddoon waxaa noqo karaya qofka ugu da,weyn dhakhaatirta iyo xubnaha meesha fadhiyo.)

gudoomiye, mudane yaal,

akhrinta labaad waax ka qorney doodiin ku aadaneed sharcigaa oo ay ka hadleen xidhibano faro badan oo qaarkiina tilmaamayey toos qodobo qaarna ay aheed talo soo jeedin, Guddiga wuu qaatey waxii talo soo jeedin ahayd tusaale in la wanaajiyo fayodhoorka oonka xoolaha ka yimaada sida hilibka iyo caanaha , wasaarada waxey nala qeybsadeen talooyinkaasi waxey noo sheegeen in ay soo wadaan sharci caanaha lagu maareynayo howlahooda iyo tayeentooda.

mudane yaal,

Maantoo oo ay tahay 25/04/2016 waxaan hortina keennay akhrinta seddexaad ee hindise-sharciyeedka xannaaada xoolaha, haddaba waxaan idinka codsaneynaa in aad waajibaadkiina qarameed ka gudataan. GUDDIGA BEERAHA, XOOLAHA, HOROMARINTA REER MIYIGA IYO KHEYRAATKA BADDA, WAXAY SI GAAR IDINKA CODSANAYAAN IN AAD U CODEYSAAN , SIDA SHARCIGA IYO XEER HOOSAADKA BARLAMANKA QABO ,kol haddii akhrinta seddexaad marey

mahadsanidiin

Gudoomiyaha Guddiga
Xil. Saciid Maxamed Cali



Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Xoghayaha Guud



جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب الأمين العام

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the Secretary General

Ref: XGI/ 120/02/2016

Date: 1/2/2016

Ku: Gudiga Xanaanada Xoolaha iyo bey"ada

=Muqdisho=

OG : Gudoomiyaha Golaha Shacabka


=Muqdisho=


Ujeedo: Gudbin Hindise-sharciyeed

Anigoo fulinaya amarka gudoomiyaha waxaan gudiga xanaanada xoolaha iyo bey"ada G.SH idiin soo gudbinayaa hindise sharciyeedka xanaanada xoolaha oo maray aqrinta 1aad manta oo ay taariqdu tahay 1/2/2016, si aad uga gudataan waajibaadkiina dastuuriga ah.

Waxaan ku rajayweynahay in aad xiliga ku haboon ugu soo celin doontaan fadhiga golaha Warbixin gudiga

Wada shaqeyn wacan,


Xaaji Cabdikariim Xaaji Cabdi Buux
Xoghayaha Guud Ee Golaha Shacabka



Tell: +252-616101444 / +252-699261253

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xukuumadda Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha



جمهورية الصومال الفيدرالية
الحكومة الصومال
مكتب رئيس الوزراء

(The Government of Federal Republic of Somalia)
Office of the Prime Minister

Tixraac: XRW/0000 FJS /10/2015

Taariikh: 24/12/2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka JFS

=Muqdisho=

Og: Madaxweynaha JFS

=Muqdisho=

Ujeedo: Soo Gudbin 'Hindise-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha'

Mudane Guddoomiye,

Tixraac go'aanka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay SHGW.00.48.12.15 ee 24/12/2015, kuna saabsanaa ansixinta 'Hindise-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha' oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyey.

Haddaba, Mudane Guddoomiye, waxaan halkan idinkugu soo gudbinaynaa 'Hindise-sharciyeedka Xanaanada Xoolaha' si aad uga gudataan xilkiina Dastuuriga ah, waxa aan idinka codsanaynaa in aad fududaysaan ansixinta "Hindise-sharciyeedka ujeeddada sare ku xusan" maadaama baahi weyn loo qabo dhaqan-gelintiisa.

F.G: Arag Lifaaqa

Naga guddooma salaan diirran.



Mudane Cumar Cabdirashiid Cali Sharmaarke
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda J.F. Soomaaliya

+252-61-9-444004 +252-61-7-989038 E-mail:

or

Mogadishu, Somalia

nhuuriyadda Federaalka
Soomaaliya
Wasaaradda Xanaanada
oolaha, Dhirta & Daaqa

Xafiiska Wasiirka



The Federal Republic of Somalia
Ministry of Livestock, Forestry and
Range
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الثروة الحيوانية، الغابات والمراعي
مكتب الوزير

Tix: WXXDH&D/XW/0123/15

Date: DEC 19, 2015

Ku: Ra'iisul Wasaaraha J F S

" Muqdisho-Somalia"

Ujeeddo : soogudbin Hindise Sharciyeed ka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Dhirta iyo daaqa.

Wasiirka Wasaaradda Xanaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa

Markuu arkay : Muhimadda uu sharcigaan u leeyahay daryeelka iyo kafa'iidaysiga xoolaha iyo waxsoo saarkooda.

Markuu arkay : Muhimadda uu uleeyahay Daryeelka caafimaadka Xoolaha iyo dadka.

Markuu arkay : Muhimadda ay xooluhu uleeyihiin kobcinta dhaqaalaha dalka(sida dhoofka xoolaha nool iyo wax soosaarkooda) .

Markuu arkay : Saamaynta ay xoluhu kuleeyihiin nolosha umadda soomaaliyeed.

Markii uu tixgaliyay : In ay lagama maarmaan tahay Soogudbinta Hindise Sharciyeedka Xoolaha.

Sidaas awgeed , Mudane Ra'iisul wasaare ,waxaaan si qadarin iyo xushmad leh kaaga codsanaynaa in aad hindise sharciyeedkaan xoolaha iyo waxsoosaar kooda u ogolaato Inuu ugudbo golaha wasiirada si loo an sixiyo .

Mahadsanid,

Mud Siicid Xuseen Ciid

Wasiirka wasaaradda xanaanada xoolaha



Ministry of Livestock, Forestry & Range
Mogadishu, Somalia
Email: saidciid@gmail.com
Tel: +252 61 1111044



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCIGA XANAANADA XOOLAHA

Sharci Lr: _____ ee _____
Sharciga Xanaanada Xoolaha

Gogol-Dhig

Sharciga adeegga caafimaadka xoolaha, waxaa saldhig u ahaa waqtiyadii hore Sharcigii Xoolaha ee Qaranka (national veterinary code), sharci Lr. 20 ee soo baxay 27-dii Juun 1967-dii iyo Wareegtooyinkii Wasaaradeed ee raacsanaa sharcigaas kala ahaana wareegto Lr. 35 oo soo baxday 12-kii November 1969-kii, degreeto Lr. 294 ee 11-kii November 1968-dii iyo wareegtadii 15 September 1985-tii.

Sharcigii hore ee xoolaha ma uusan xusin diidmo iyo ogolaansho midna ku dhaqanka mihnadda gaarka ah ee takhaatiirta caafimaadka iyo horumarinta xoolaha, balse arinkaas waxay gacanta ugu jirtay wasaaradda xanaanada xoolaha, dhirta iyo daaqa oo ku ogolaanaysay ama ku diidaysay wareegto wasiir soo dejinta talaalka iyo daawaynta xoolaha.

Si loo fuliyo shuruudihii iyo barjaamijyadii ay soo gudbiyeen hay'adaha deeqda bixiya 1980-kii, ayaa Wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta Iyo Daaqa waxay soo saartay wareegto 1985-tii taas oo ogolaanaysa in si gaar ah loo soo dejin karo liis ka mid ah daawooyinka xoolaha lana qaybin karo taasoo lagu soo saaray wareegto la magac baxday "ogolaanshaha ku shaqaynta mihnadda gaarka ah ee xoolaha iyo qaybinta daawooyinka xoolaha" (Veterinary Privatization and Drug Distribution). Si kastaba ha ahaate, dib u habayntii siyaasadda iyo shuruucda waa la ogolaaday, balse ma fidin waxna sooma kordhin, waxaana isla markiiba joojiyey dagaaladii sokeeye ee dalka ka dhacay 1990-kii.

Hirgelintii hay'adda ganacsiga aduunka (WTO) heshiis sanadeedkii 1995-tii iyo hishiisyadii ku xigay ee la xiriiray dhinaca ilaalinta nadaafadda iyo caafimaadka waxyaalaha la dhoofinayo ama la soo dejinayo ee aduunku isdhaafsanayo (sanitary and phyto-sanitary measures) kuwaas oo ku qeexan hishiiska SPS agreement iyo buugga caafimaadka xoolaha ee adduunka oo ay soo saarto sanad walba Hay'adda Caafimaadka Xoolaha ee Adduunka (OIE). Sharciyadan waxay koobayaan qaab raaca sharciyada tilmaamo ku hagaya iyo talooyin si aad u hubisid fulinta bad-baadada caafimaadka ganacsiga adduunka (sanitary safety of international trade) ee la xiriira xoolaha iyo wax ka soo baxa xoolaha (Exports of Animal and Animal Products).

Iyadoo la fiirinayo isbedelada waawayn iyo horumarka la hiigsanayo ayaa wasaaradda Xanaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, waxay abuurtay koox dhaqaatiir ah oo uu ku jiro sharciyaqaano si ay dib u habayn ugu sameeyaan sharcigii hore ee xoolaha (Old Veterinary Law Code) isla markaana ay ugu soo daraan horumarka laga gaaray dhinaca sharciyada xoolaha ee adduunka iyo halbeegyada (standards), tilmaamaha iyo talooyinka ay soo saartay Hay'adda Caafimaadka Xoolaha ee OIE.

Marka loo firiyo tirada isbedellada iyo horumarka uu xambaarsanyahay sharcigani lana barbardhigo sharcigii hore, waxaa la dhihi karaa waa soo saaristii Sadexaad (Third edition). Saddexda waxyaabood ee ugu waawayn ee uu sharcigani taabanayo waxaa ka mid ah:

- a. Sheegista jiritaanka cudurka iyo dhawristiisa (disease notification and security);
- b. Shahaadada caafimaadka xoolaha ee lagu dhoofinayo ama lagu soo gelinayo dalka gudihiiisa xoolaha iyo waxa ka soo baxa xoolaha; iyo
- c. Ogolaanshaha dhaqaatiirta xoolaha ee madaxa bannaan ama aan u shaqayn dawladda in ay fuliyaan isla markaasna qabtaan hawlaha caafimaadka xoolaha qaarkood kadib markey Wasaarada ka helaan ogolaansho rasmi iyadoo Wasaaradu Mar walba leedahay Masuuliyada Kormeerka iyo hubinta.

Si kastaba ha ahaatee, sharcigani waa bilaw waxaana dhamaystiri doona sharciyada kale oo iyaga laftigoodu Wasaaradu ay gacanta ku hayso kuwaas oo lagu xakamaynayo laguna hormarinayo shaqooyinka soo socda:

1. Sharciga barista hilibka (Meat Inspection Act), kaas oo ah qayb ka mid ah baahinta jiritaanka cudurada iyo warbixinada la xiriira.
2. Sharciga u diyaarsanaanta iyo ka jawaabidda cudurada sida kadiska ah u dillaaca habraacooda iyo tilmaamahooda (emergency preparedness and response (EPR Law).
3. Sharciga Sunta Cayayaanka (pesticides Act) oo la xiriira dhinacyada xoolaha, Beeraha iyo Deegaanka.
4. Sharciga xoolaha ee hab dhaqameedka xanaanada xoolaha (Veterinary Code of Ethics).
5. Shirciga xoolaha biyaha berri ku noolka ah, biyo ku noolka ah iyo wax soo saarkooda (Aquatic Animals and Products Act).
6. Sharciga daboolaya shaqa wax soo saarka xoolaha, horumarinta xoolaha iyo shaqooyinka ganacsiga beeraha (regulations covering animal production/Zoo Technical Services and Agribusiness).

Sharcigani wuxuu muhiimiyad wayn ugu fadhiyaa dhammaan bulshada ku hawlan ama ka shaqaysta wax soo saarka xoolaha sida: xoolo dhaqatada, ganacsatada, gaadiidlayda, dullaaliinta, xaraasayaasha, dhaqaatiirta caafimaadka iyo horumarinta xoolaha iyo hay'adaha kala duwan ee ku lugta leh dhoofinta iyo soo dejinta xoolaha iyo waxa ka soo baxa xoolaha, kaas oo u sahlaya qaababka ugu habboon ee looga hortagi karo laguna xakamayn karo cudurada xoolaha gaar ahaan kuwa isaga gudba xuduudaha (Transboundary animal diseases). Waxaa hubaal ah in sharcigani uu rool wayn ka ciyaari doono xiriirka ganacsiga caalamiga ah iyo horumarinta xiriirka ganacsiga ee dalalka aan u iib gayno xoolaha kuwa aan ka soo iibsano waxyaalaha ka soo baxa xoolaha (animal products).

Hordhac

Waa lagama maarmaan waana loo baahanyahay in tallaabooyin hore loogu qaado oo la xiriirta saldhigidda tabaha caafimaadka xoolaha iyo xakamayna cudurada taas oo qayb ka qaadanaaya hormarinta xoolaha soomaaliyeed iyadoo la dhawrayo talooyinka, xeerarka iyo halbeegyada goboleedka iyo kuwa caalamiga ah intaba.

Waxaa loo baahanyahay in la helo lana diyaariyo shuruuc iyo xeerar, lana dhaqan geliyo, lana hirgeliyo isla markaana la xoojiyo, helidda shuruucdaas waxaa u baahan hay'adaha dawliga ah ee xanaanada xoolaha si ay u fuliyaan waajibaadka ay sharciga u leeyihiin. Sharcigani waa in uu ogolaanayo in loo sameeyo saldhig ay ku shaqeyaan Hay'adaha Xanaanada Xoolaha, abuuris hay'ado diiwaan geliya iyo jiritaanka ku shaqaysiga mihiinadda gaarka ah ee xanaanada xoolaha. Sharciga qaranku waa in sidoo kale lagu daro oo uu ka mid noqdaa shuruucda madaniga ah ee dawladda. Jiritaanka sharcigan wuxuu lagama maarmaan u yahay isla markaana u awood siinayaa ururada xanaanada xoolaha si ay u xakameeyaan dhaqdhaqaaqa xoolaha iyo la wareegidda ama burburinta xoolaha ama wax ka yimid xoolaha lala xiriirinayo shaqooyinka lagu xakamaynayo ama lagu ciribtirayo cudurada.

Sharciga xoolaha waa in uu la jaan qaadaa farsamada casriga ah ee waqtiga xaadirka ah iyo sharciyada caalamiga ah ee ganacsiga sida kuwa Hay'adda Caafimaadka Xoolaha Adduunka (OIE) iyo shuruudaha hishiiska SPS ee hay'adda ganacsiga adduunka (WTO). Sidoo kale, waa in uu muujinayo sharciyada diiwaan gelinta iyo kontoroolka tayada daawooyinka xoolaha waana in uu raacsanyahay talooyinka iyo tusaalooyinka sharciyada caalamiga iyo kuwa hay'adda OIE. Sidoo kale, sharciga xoolaha waa in uu qeexayo shuruucda qaranka ee la xiriira hawlaha uu qabanayo qaybta gaarka ah (private sector) kuwaas oo u baahan kara in dib u habayn lagu sameeyo iyadoo la tixgelinayo cabsida maanta jirta ee dhinaca isku gudbinta cudurada xoolaha iyo dadka isqaadsiyaan. Shuruucda qaranka waxaa looga baahanyahay in ay muujinayaan sharciga xanaanada xoolaha iyo qaabka loo fulinayo hawlaha caafimaadka xoolaha. Koox la talilayaal dhinaca sharciga xoolaha ayaa soo ururinaya xog dheeraad ah iyagoo isticmaalaya xog waraysiyo ay waraysanayaan kana soo ururinayaan xog qaybta xoolaha laga soo bilaabo gunta hoose illaa kor oo ay dhammaan qayb ka qaadayaan soona jeedinayaan talooyin la xiriira sidii loo diyaarin lahaa sharciyo, qaanuuno iyo talooyin lagu diyaariyey sharciga xoolaha.

Dadka ka qayb qaatay waxay isugu jiraan dad ka shaqeyaa dhinaca dawladda iyo ururada dhaqaatiirta ee madaxa bannaan ee xanaanada xoolaha, ganacsato, xoolo dhaqato, ganacsatada daawooyinka xoolaha iyo hoggaamiyayaal kale oo badan.

Dhammaan dadkii lagala tashaday diyaarinta sharcigan xoolaha waxay ku taliyeen in sharcigani uu tix geliyo sharciyadii hore ee xanaanada xoolaha sida sharci Lambar 20 ee 27dii Juuniyo 1967 iyo wareegtooyinka wasiirka Lambar 294 ee 11-kii November 1968 iyo wareegtadii 15-kii Sibteembar 1985-tii isla markaana ay noqdaan kuwo la mid ah sharciga cusub ee xoolaha isla markaana uu la jaanqaadi karo sharciyada kale ee dalalka aan dariska nahay si loo helo isku mid ahaansho sharciyada Geeska Afrika.

Waxaan rajaynaynaa in sharcigan xoolaha uu qiima wayn ugu fadhin doono dhammaan xubnaha qaybta xoolaha kaasoo u ay ka heli doonaan sharciyada ay u baahanyihiin iyo jawi farsamo kaas oo u hubinaya si hufan ka hortagga iyo xakamaynta cudurada xoolaha, markii lagu daro kuwa iskaga gudba xuduudaha, oo isla markaana qayb wayn ka qaata horumarinta ganacsiga caalamiga ah iyo xiriirka dhoofta iyo soo dejinta ee la leenahay dalalka aan xoolahena u iib gayno.

Cutubka 1aad:
Erey-bixin
Qodobka 1aad:
Eray-bixin

Sarkaal Maamul: Waxaa loola jeedaa masuulka sharciga ah oo u qaabilsan X. xoolaha

Xayawaan: Waa dhammaan xoolaha leh laf-dhabarta iyo kuwa aan laf-dhabarta lahayn oo aanu ku jirin dadku.

Xoolo qalliin: Waa xoolo loogu talo-galay in la qalo.

Rugta Gowraca ama Qalliinka: Waa dhismo loogu talagalay in lagu qalo xoolaha

Cudur Xoolaad: Waa xanuun kasta oo ku dhaca xoolaha.

Oonta Xoolaha: Waa waxa ka soo baxa xoolaha sida: Hilib, Caano, ukun, Malab, Subag, Lafo, harag, iwm.

Kaaliye Dhakhtar Xoolo: Waa qof haysta shahaado machad cilmiga xoolaha ah, kaasoo la aqoonsan yahay ugu yaraan 2 sano.

Xaaladda Caafimaad ee Xoolo: Waa xaalada caafimaad ee xoolaha ku sugan yihiin ee dal, goob, ama aag si waafaqsan shuruucda caalamiga ururka Caafimaadka Xoolaha adduunka(OIE)

Shimbir: Waa nooc walba oo kamid ah shimbiraha oo la dhaqdo ama duurjoog ah iyo ukumaha ama ugxaanta shimbirahaas.

Guddi: Waa Guddiga Qaranka ee takhaatiirta Xannaanada Xoolaha.

Hilib Neef Is-qaba: Marka laga eego xagga kontroolka hilibka, waxaa loo la jeedaa jirka neef dhintay oo isqaba, xagga fayadhowrka marka laga eegayana waxaa loo la jeedaa jirka neef kastoo la qalay ee dhiig-baxaya.

Lo' Waa nooc walba oo ka mid ah Lo'da sida Saca, Qaalinta, Dibiga, Lo'-gisiga iyo Weylaha.

Buugga Hab-raaca: Waa buug ay ku qorantahay qaabka loo baaro oonta Xoolaha oo ay jideeyaan xeerhoosaadyada sharcigan la xiriira.

Xaalad: Waa eray loo isticmaalo neef xoolo ah oo qaba cudur la is-qaadsiiyo ama cudur uu sababay deris-ku-nool, sida gooryaan, shilin iym.

Dhakhtar Caddeyn bixiya: waa takhtarka Xannaadada Xoolaha ee sameeya, qora oo saxiixa shahaadooyinka caafimaadka xoolaha ee caalamiga ah.

Rugta Adeegyada Caafimaadka Xoolaha: Waa goobta lagu baaro xoolaha sida shaybaarka, daaweynta, qalista xoolaha, ka-hortagga iyo meesha lagu siiyo shahaadooyinka.

Kood (Code): Waxaa loola jeedaa sharciga Xannaanada xoolaha.

Jeermi-dil: Waa shaqo loola jeedo in lagu dilo jeermis (cudur dhaliye (ama deris-ku-nool goob ay ka jiraana.

Gungaar Baaris Cudur: Waa hab baaritaan dhameystiran oo lagu ogaano sababta dhalisay cudur xoolaha ku dhacay ayna isqaadsiiyaan

Goob Cayiman: Waa goob ama dhime tilmaaman sida Kawaanada, xeryaha takoorka, iyo meelkasta ee sharcigan caddeeyey.

Xero: Waa meel loogu talo-galay in lagu hayo, xoolo.

Habka hore-uga-warqab: Waa qaabka ay isticmaasho hay'adda xannaadada xoolaha si ay ku sii ogaato xilli hore jiritaanka cudur xoolaad.

Dal bedeeco dhoofiya: waxa loo la jeedaa dal dhoofiya xoola nool iyo waxyaalaha ka soo baxa ee ku tilmaaman sharcigaan una dhoofiya dal kale.

Aag dhawrsan: Waxa loo la jeedaa dhul si caddaan ah loo qeexay oo dalka ka mid ah oo in muddo ah, aan laga soo sheegin cudur ka mid ah cudurrada ku tilmaaman Xeerka caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha (OIE). Aaggaas oo saraakiisha caafimaadka xoolaha ay soo hubiyeen caafimaadka xoolaha, waxyaabaha laga soo saaro iyo raristooda.

Goob cudur saameeyey: Waa aag lagu soo calaamadeeyey in uu ka jiro mid kamida ah cudurrada faafa ee xoolaha. Ku dhawaaqidana waxaa leh Wasiirka Xannaanada Xoolaha

Sarkaalka barista: Waxa loola jeedaa sarkaal kasta oo ku hawlan caafimaadka xoolaha, waxaana noqon kara qof kasta ee uu Agaasimaha Caafimaadka Xoolaha u idmay in uu qabto hawlo la xiriira caafimaadka xoolaha.

Dhacdo Cudur: Waxaa loola jeedaa tirada cudurku xoolaha ku cusub yahay ama inta jeer ee uu dillaaco cudur ka dhaca aagag iyo waqtiyo kooban.

Dalka wax soo-degsada: Waxaa loolajeedaa dalka ugu dambayntii ay tegeyso alaab la diray (la doofiyeey).

Shahaadada Caalamiga ee Caafimaadka Xoolaha: Waxaa loola jeedaa shahaado loo soo saaray si waafaqsan tusaalooyinka OIE ee tilmaamaya caafimaadka xoolaha iyo/ama shuruudaha caafimaad oo la doonaya in ay buuxiyaan alaabada la dhoofinayo.

Ganacsi Caalami ah: Waxaa macnaheedu yahay soo-dejinta, dhoofinta iyo maritaanka badeecooyinka laga ganacsado.

Bar-xoolaad: Waa dhammaan xoolaha la dhaqdo nooc kasta oo ay yihiin sida: Geela, Lo'da, Ariga (ido iyo ari-cad), Dameeraha, Fardaha, iwm.

Wasiir: Waxa loo la jeeda Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha.

Hilib: Waa qayb kasta oo ka mid ah jirka xoolaha ee u suubban in la quuto.

Xeer Wasiir: Waxaa loo la jeedaa xeer kasta oo qoraal rasmi ah, ama awaamirta uu soo saaro Wasiirka Xannaanada Xoolaha isagoo qeexaya sharci ama tilmaamo cadcad oo la xiriira arrimaha xoolaha kutilmaaman xeerkan kaas oo yeelan kara kударis ama ka dhimis xeer.

Cudur ka-warbixin mudan: Waxaa loo la jeedaa cudur ay sharciyan waajib tahay in lagu wargeliyo hayadaha Dowladda, waana nooc kamid ah noocyada cudurrada ku cad liiska buugga caafimaadka xoolaha dhulka ee OIE.

Wargelin, Gaarsiin ama ka-warbixin: Waa qaabka loo gudbiyo xogta cudurrada xoolaha ee waddanka gudhiisa ama loo dirayo Dalal kale ama OIE.

Dhakhtarka Caafimaad Xoolo ee Rasmi ah : Waxa loola jeedaa Dhakhtar caafimaad xoolo ee uu Maamulka Xannaanada Xoolaha u idmay in uu fuliyo hawlo la xiriira iyo/ama baaritaanka caafimaadka guud iyo fayadhowrka ee badeecooyinka asal ka soo jeeda xoolaha.

Milkiile: Waxa loola jeedaa qofka leh, masuul ka ah, gacanta ku haya ama ilaaliya neefka xoolaha ah.

Deked: Waxaa loo la jeedaa garoon kasta ee diyaaradeed, Dekad ama rug-baaris oo u furan ganacsi caalami ah ee badeecooyin ka yimaada xoolaha, halkaas oo laga fulin karo baaritaan la xiriira xoolaha iyo waxyaabaha ka soo baxa.

Oonta xoolaha ka soo askuntay ee loogu talo-galay in aadanuhu quuto : Waxa loola jeedaa nooc kasta oo oon xolaad ah ee uu dadku quudan karo, sida hilibka, ukunta, caanaha, malabka, subaga, iwm.

Goob badbaado: Waa goobta loogu talo-galay in lagu ilaaliyo xaaladda caafimaadka Xoolaha.

Xarun Karantiin: Waa xero gacanta Hayadda Xannaanada Xoolaha, halkaas oo xoolaha lagu go'doomiyo ama lagu gooni-sooco, ayaga oo wax xiriir ah (toos iyo dadab toona) la yeelanaynin xoolaha kale, sí loogu hayo isha muddo kooban, haddii loo baahdana lagu sameeyo tijaabooyin baaris, iyo daweyn.

Diiwaan-geliye: Waxa loola jeedaa Diiwaan-geliyaha Guddiga Qaranka ee Takhaatiirta Xannaanada Xoolaha.

Diiwaan: Waa diiwaanka uu hayo Diiwaan-hayaha Guddiga Qaranka ee Takhaatiirta Xannaanada Xoolaha.

Dhakhtarka Qalliinka Xoolaha: Waa takhtarka qalliinka Xoolaha oo uu magaciisu ku qoran yahay diiwaanka uu hayo Diiwannhayuha guddiga qaranka.

Kaaliye Caafimaad Xoolo ee Diiwaan-gashan: Waxa loola jeedaa kaaliyaha caafimaadka xoolaha oo uu magaciisu ku qoran yahay diiwaanka uu hayo Diiwaan-hayaha guddiga qaranka.

Farmashiistaha Diiwaangashan: Waa farmashiistaha oo uu magaciisu ku qoran yahay diiwaan Hayadda ku shaqo leh xannaanada xoolaha.

Farsama-yaqaan Xoolo: waa takhtarka Horumarinta Xoolaha oo uu magaciisu ku qoranyahay diiwaanka Guud ee Guddiga Qaranka Takhaatiirta Xannaanada Xoolaha.

Goob Baxnaano: waa dhul cayiman oo la xaddiday oo had iyo jeer lagu baaro cudur ka mid ah cudurrada lagu tilmaamay sharciga (Koodkan), sí waafaqsan tilmaamaha iyo tusaalooyinka OIE ee cudurkaas.

Gaari: Waa nooc kasta oo kamid ah gaadiidka dhulka

Gaadiid-badeed: Waa nooc kasta oo kamid ah gaadiidka badda.

Maamul Xannaano Xoolo: Waa xafiis Dawladeed oo u xilsaaran fulinta hawlaha la xiriira caafimaadka xoolaha iyo qaabka shahaada-siinta caalamiga ah xagga wixii ku saabsan xoolaha.

Xafiiska Daryeelka Caafimaadka Xoolaha: Waa Adeegga Caafimaadka Xoolaha ee hoos imanaya wasaaradda xannaanada Xoolaha, oo sí toos ah uga masuul ah inuu tillaabootin caafimaad ka hirgeliyo meelo cayiman oo waddanka ka mid ah. Xafiiskaas waxay kaloo masuul ka noqon karta soo-saaridda ama kormeerka soo-saaridda shahaadooyinka caalamiga ah ee ku saabsan caafimaadka xoolaha ee aaggaas.

Adeeg Caafimaadka Xoolaha: Waa dhammaan hawlaha oo ay fuliyaan shaqaalaha wasaaradda iyo kuwa gaar ahaaneed oo u idman fulin howl caafimaad.

Dhakhtar Caafimaad Xoolo ee Rasmi ah: Waa takhtarka caafimaadka xoolaha oo si rasmi ah ugu shaqeeyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha iyo dhamaan takhaatiirta ka diiwaan gashan Guddiga Qaranka ee Takhaatiirta Xoolaha.

Cutubka 2aad:

Qodobo Guud

Madaxa 2.1. Ujeeddooyinka Guud iyo Masuuliyadda Wasaaradda

Qod. 2.1.1.

Ujeeddooyinka

Wasaarada X. Xoolaha Soomaaliya waxey ilaalinaysaa caafimaadka guud ee xoolaha Qaranka si waafaqsan horumarinta iyo abaha siyaasadda qaranka soomaaliyeed waxeyna ka hirgelineysaa dhammaan dalka oo dhan:

1. Horumarinta daryeelka xaaladda caafimaad iyo tayo ee Xoolaha Dalka
2. Ka qeyb-qaadashada ilaalinta caafimaadka Aadanaha
3. Hirgelita habraacyada caalamiga ah ee shahaada-siinta caafimaadka xoolaha, iyo kormeerka iyo dabagalkooda
4. Ilaalinta xoolaha, daryeelkooda iyo barwaaqeyntooda

Qod. 2.1.2.

Masuuliyadda Wasaaradda Xannaanada Xoolaha

Masuuliyadda Wasaaradda Xannaanada Xoolaha waxaa kamid ah:

- a. Ilaalinta iyo xakameynta cudurrada xoolaha;
- b. Baarista, ka warbixinta iyo baahinta jiritaanka cudurrada xoolaha;
- c. Ka hortagga, xakameynta iyo ciribtirka cudurrada xoolaha;
- d. Kontroolka cudurradda Dadka iyo Duunyadu kala qaadaan (Zoonoses), nadaafadda cuntada iyo baarista oonta xoolaha;
- e. U diyaar-garowga iyo ka jawaabidda xaaladaha deg-degga ah ee caafimaadka xoolaha.
- f. Ka hortagga cudurrada faafa ee la is qaadsiiyo;

- g. Baarista iyo shahaadda-siinta Xoolaha iyo Oonta Xoolaha oo laga dhoofinayo ama la soo gelinayo Dalka si waafaqsan shuruuc Dalka iyo Caalamka;
- h. La socodka cudurrada Xoolaha Duurjoogta Dalka;
- i. La socodka Xaaladda Caafimaadka Xoolaha ku hoos nool biyaha Badda, harooyinka iyo Webiyada;
- j. U gudbinta warbixinta xaaladda caafimaadka Xoolaha ee Hay'adda caafimaadka Xoolaha Adduunka iyo dalalka deriska ah iyo kuwa aan la leenahay xiriirka ganacsi;
- k. Daaweynta, ka hortagga iyo la socodka calaamadaha cudurradda Xoolaha;
- l. Xakameynta, Baarista tayada Daawooyinka iyo Tallaalka Xoolaha ;
- m. Hubinta dhowrista xuquuqda xoolaha muddada la xanaaneeynayo, la dhoofinayo, la rarayo, ama la qalayo;
- n. Horumarinta Waxbarashada, Tababarrada shaqaalaha, Cilmi-baarita Xoolaha iyo fidintooda;
- o. Nidaaminta Suuqyada xoolaha iyo habka Suuqgeeynta xoolaha;
- p. Nidaaminta, dabagalka iyo taageeridda Hay'adaha Caalamiga ah iyo kuwa deegaanka ee ku hawlan arrimaha Caafimaadka iyo Horumarinta Xoolaha.

Qod. 2.2.

Hawlaha Caafimaadka Xoolaha ee dowliga ah (Public sector) iyo kuwa aan dowliga aheyn (Private sector)

Qod. 2.2.1.

Hawlaha Caafimaadka Xoolaha ee dowliga ah (Public Sector) iyo kuwa aan dowliga aheyn (Private Sector)

Hawlaha caafimaadka xoolaha waxay isugu jiraan kuwo dowliga ah (public) iyo kuwo aan dowliga aheyn intaba.

Qod. 2.2.2.

Waajibaadka Shaqada ee qeybta Dan Guud iyo madda dan Gaarka (the Public & Private)

1. Dowlaha iyo waajibaadka shaqo ee kuwa aan dowliga aheyn waxaa kamid ah:
 - a. Mamulka hawlaha rugaha caafimaadka xoolaha sida: Daweynta, Qalliinka, ka hortagga cudurrada, baarista cudurrada xoolaha, xog ururinta cudurrada iwm ah.
 - b. Soo dejinta, qaybinta, keeydinta iyo hal gadida dawooyinka xoolaha, iyo qalabka shaqada, marka ay ka helaan ogolaasho wasaaradda
 - c. Ogolaashaha Maamulidda xarumo wax soo saarka xoolaha iyo shaqooyinka la xiriira isku dhafka xoolaha iyo Beeraha, suuqgeeynta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha
 - d. Ka qeyb qaadashada hawlaha fidinta Xannaanada Xoolaha.
2. Xilalka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha ee ku qoran qodobka 2.1.2 ee aan ku jirin liiska qeybta aan dowliga aheyn - ee qodobka 5aad, waxey hoos imanayaan maamulka dowladda, balse waxaa loo wakiilan karaa ama qandaraas hoosaad lagu siin karaan hay'adaha aan

dowliga aheyn(Gaarka loo leeyahay) ayada oo dowladda lahaanesyso kontroolka, dhowrista iyo soo saarista sharciyada , xakametnta iyo dhaqan gelinta intaba.

3. Maamulka Xannaanada Xoolaha, wuxuu abuurayaa jawi lagu hormarinayo hay'adaha gaarka loo leeyahay (private Sector) iyadoo shaqooyinka danta guud loo wakiilan karo hay'adaha gaarka loo leeyahay (Private Sector).
4. Maamulka Xannaanada Xoolaha wuxuu bixinayaa shaqo xirafadeed uu lacag ku qabanayo (Professional Services) intii uu Kari karo sida uu qorayo sharcigani.

Qod 2.3.

Habraaca Hay'adaha

Qod. 2.3.1.

Masuuliyadda Wasiirka Xannaanada Xoolaha

Masuuliyadda Wasiirka waxaa ka mid ah:

1. Wasiirku waa madaxa ugu sarreeysa Hay'adda Maamulka Xannaanada Xoolaha wuxuuna noqonayaa waajibaadkiisa guud ee shaqo ilaalinta siyaasadda Xoolaha ee Qaranka iyo shaqooyinka la xiriira.
2. Wasiirku isagoo la tashanaya Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha, wuxuu soo saari karaa qaacidooyin, xeerar iyo tilmaamo kaabaya sharciga Xoolaha,

Qod.2.3.2.

Awoodda soo saarida habraac shaqo sharci ah

- a. Markii uu u arko lagama maarmaan, Wasiirku wuxuu awood u leeyahay inuu soo saaro Xeer iyo fariimo uu ku mamnuucayo ama uu nidaam ugu dejinayo dhoofinta iyo soogelinta Dalka xoolo oo dhan, ama nooc kamid ah xoolaha, karakaska ha laga tuuro, Hilibka, Hargaha, Timaha, Dhogorta, Dufta, seynta, geesaha, Cidiyaha, Qoobabka, Shahwada xoolaha, Dhiigga ama dhacaanka dhiigga (Sera), Tallaalka iyo wixii kale ee la xiriira ee Kiimikaalis ah looguna talagalay in laga ilaaliyo cudurrada xoolaha oo ka socda ma ka imanaya Wadan khaas ah lagana soo dejinayo ama laga dhoofinayo Dekad ama goob waddanka kamid ah.
- b. Wuxuu soo saari karaa Dekreeto uu ku xadidayo waqtiga ay xooluhu ku jirayaan Karantiinka inta aan la dhoofin ka hor iyo in la qaado tillaabooyin xagga fayadhowrka la xiriira ee ku wajahan xoolaha la dhoofinayo ama dalka la soo gelinayo;
- c. Wuxuu soo saari karaa hab-raac hawl-gal ee uu Dhakhaatiirta Caafimaadka Xoolaha ugu oggolaanayo in ay fuliyaan Baaris Caafimaad ee lagu samaynayo Xoolaha nool iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha ee laga dhoofinayo ama la soo gelinayo Dalka Guduhisa isla markaana ay ku siinayaan shahaaddada Baarista Caafimaadka xoolaha markii ay ku qancaan caafimaadka xoolahaas, kadib iyagoo raacay qodobada koodka iyo sharciga Hay'adda Caafimaadka Xoolaha Aduunka ee OIE.
- d. Wuxuu soo saari karaa isagoo la tashanaya Guddigga Qaranka ee Xannaanada Xoolaha (National Veterinary Board), hab-raac hawl-gal ee rasmi ah oo uu idmaya Dhakhaatiirta

Xannaanada Xoolaha, shirkadaha, ururrada gaarka ah in ay fuliyaan hawlo rasmi ah ee la xiriira caafimaadka xoolaha;

- e. Wuxuu soo saari karaa Dekreeto wareegto uu ku xaddidaayo goobo cayiman oo uu Cudur ka jiro si loo ilaaliyo cudurkaas isagoo raacaya tilmaamaha Hay'adda OIE isla markaana ka soo saaraya go'aamo cad cad ee lagu ilaalinaayo Cudurka Goobtaas.
- f. Wuxuu soo saari karaa tilmaamo la xiriira qaabka iyo meesha loo marayo xiriirka iyo wakiilashada hay'adaha caalamiga sida: FAO, WHO, OIE, AU-IBAR, IAEA iyo WTO, shaybaarrada Gobolka sida: KARI iyo ILRI, dalalka aan deriska nahay iyo kuwa aan la leenahay xiriirka ganacsi.
- g. Wuxuu jideeyn karaa kuna soo saari karaa Dekreeto Wasiir ama (Xeer) in khidmad adeeg laga qaado dhammaan adeegyada ay qabaneeyso Hay'adda Xannaanada Xoolaha
- h. Wuxuu soo saari karaa Dekreeto oo uu ku dhaqan gelinayo tilmaamo cad oo la raaco lana xiriira soo dejinta, maamulidda iyo isticmaalka Tallaalka Xoolaha iyo kimikaaliska kale.
- i. Wasiirku asaga oo raacaya talada iyo heshiiska uu la galo hayadaha kale ee Dowladda, wuxuu hawlo mucayan ah, ee la xiriira Adeegga Caafimaadka Xoolaha, u xilsaari karaa guddiyo madax banaan, wakaalado ama hay'ado hoos imanaya Maamulka Caafimaadka Xoolaha.
- j. Maamulka Caafimaadka Xoolaha wuxuu hoos imanayaa Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha kaasoo warbixin toos ah siinaya Agaasimaha Guud iyo Wasiirka.

Qod. 2.3.3.

Waajibaadka Waaxda Caafimaadka Xoolaha

1. Waajibaadka Waaxda Caafimaadka Xoolaha waxaa ka mid ah:
 - a. Soo jeedinta tabaha iyo siyaasadda qaranka ee caafimaadka xoolaha
 - b. Ka-tala-bixinta habka loo kala hormarinayo wax ka qabashada iyo la socodka xaaladda cudurrada xoolaha ee gobolada iyo degmooyinka.
 - c. Qorsheeynta iyo hirgelinta shaqooyinka.
 - d. Diyaarinta khrashaadka lagu hawl gelayo.
 - e. Maamulidda shaqaalaha iyo waxyaabaha lagu shaqeynayo.
 - f. Qiimeeynta dhinaca faa'idada iyo kharashka ee hawlaha la qabanayo
 - g. La-sameeyn xiriir wada shaqeynayd ee dalalka aan deriska la nahay, kuwa aan la leenahay xiriirka gancasi iyo hay'adaha Qaranka iyo kuwa Caalamiga ah.
 - h. Xiriir wada shaqeynayd ee ka dhaxeeya hay'adaha dawladda ee dhinaca caafimaadka dadka iyo xoolaha si loo xakameeyo meesha uu ka imanayaan cudurrada xoolaha iyo dadku is qaadsiiyaan, sidoo kale xiriirka wada shaqeynta waaxyada wax soo saarka xoolaha, Beeraha iyo deegaanka si loo yareeyo wax yeeleynta deegaanka si loo xakameeyo meesha uu ka imanayaan cudurrada xoolaha iyo dadku is qaadsiiyaan
 - i. Wacyi gelinta bulshada isagoo u gududbinaya xogta la xiriirta cudurrada iyo qaabka loo xakameeyo.
 - j. U gudbinta warbixinta cudurrada Xafiiska Caafimaadka Xoolaha ee Adduunka (OIE).
 - k. Ugu dambeeyn Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha wuxuu u xilsaaranyahay lagulana xisaabtamayaa shahaadada caafimaadka xoolaha ee la xiriirta xiriirka caalamiga ah ee ganacsiga.

- l. Hawl galinta Iskuduwayaasha gobolada iyo degmooyinka dalka si ay u fuliyaa adeega caafimaadka si ay u soo gudbiyaan xogta caafimaadka xoolaha.
- m. Dhamaan ururrada caalamiga ah, kuwa maxaliga ah iyo shaqsiyaadaka gaarka ah ee ku hawlan adeega caafimaadka xoolaha waxey si toos ah warbixintooda ugu gudbinayaa maamulayaasha demooyinka iyo gobolada ay ka shaqeyaan.

Qod. 2.3.4.

Guddiga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xannaanada Xoolaha.

Dawladda Soomaaliya waxeey yeelan doontaa hay'ad sharci ah oo ay xubino ka yahiin dhammaan Dhakhaatiirta, farsama yaaqaannada xannaanada xoolaha oo lagu magacaabay Guddiga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xannaanada Xoolaha (National Veterinary Board) sida uu qabo sharcigan Xannaanada xoolaha.

Qod.2.3.5

Xilka Guddiga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xoolaha

- a. Xilalka hoos imaneeya isla markaana ka madax bannaan Maamulka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha;
- b. Dejinta xeerka lagu tababarayo laguna diiwaan gelinayo takhaatiirta iyo farsamayaqaanada Xannaanada Xoolaha iyo kuwa qabanaya howsha caafimaadka xoolaha;
- c. Sharciyeeynta iyo qiimeeynta shaqada bahda Xannaanada Xoolaha ay qabanayaan iyo habka ay shaqadooda u fulinayaan.
- d. Sharciyeeynta daawooyinka loo isticmaalayo xoolaha
- e. Hubinta iyo qiimeynta shahaadooyinka
- f. Hubinta iyadoo la shaqeynaya Maamulka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha qaabka ay shaqada xannaanada xoolaha u socoto loona fuliyo;
- g. Ogooshaha furashada rugta meheradaha gaar

Qod.2.4.

Diyaarinta Hindise-Sharciyeedyo iyo Qawaaniin

Qod.2.4.1.

Awoodda diyaarinta Hindise-Sharciyeedyo iyo Qawaaniin

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, kadib markii ay la tashiyo la sameeyso Bulshada Xannaanada Xoolaha (Stakeholders) iyo Guddiga Xannaanada Xoolaha ee Qaranka, waxay diyaarin kartaa hindise sharciyeedyo iyo qawaaniin saa'id ah ee la xiriira dhoofinta iyo soo dejinta Xoolaha iyo oontooda, ka ilaalinta Cudurrada Xoolaha, iyadoo hindise-sharciyeedyadaas saldhig u yihiin shuruudaha Dalalka aan u dhoofinno Xoolahenna iyo shuruudaha Hay'adda Caafimaadka Xoolaha ee Aduunaka (OIE).

Cutubka 3aad.

Warbixinta Cudarada iyo Waajibaadka Guud

Qod. 3.1.

Waajibaadka Guud

Hayada xannaanada Xoolaha waa in ay:

- a. Abuurtaa jawi lagu fulin karo Sharciga Xannaanada Xoolaha iyo Dekreetooyinka la xiriira, isla markaana adkaysaa dhowrista iyo raacista tilmaamaha iyo talooyinka xafiiska Caalamiga ah ee hubiya Caafimaadka Xoolaha iyo wixii la xiriira sida: (OIE, WTO/SPS, AU-IBAR iyo WHO) iyo Hay'adaha fududeeya hawlaha Caafimaadka Xoolaha sida: (FAO, WHO, IAEA).
- b. dhawrtaa xuquuqda uu dal kale u leeyahay in uu iska hubiyo isla markaana qiimeeyo awoodda Dalka ee la xiriirta heerka hawlaha caafimaadka xoolaha, arrintaasoo la xiriirta dhinaca ganacsiga ee labada dal ee wax is dhaafsanaya.
- c. In ay Dalalka kale siisaa xog, iyadoo loo sii marsiinayo Xafiiska Caafimaadka Xoolaha ee Adduunka OIE iyo Hay'adaha kale ee heer Gobol ama Caalami ee ku shaqo leh Caafimaadka Xoolaha, xog kasta ee loo baahan yahay si yaraynayo fiditaanka cudurrada ka warbixintooda ay sharciyan khasabka tahay, khaas ahaan waa in la bixiyaan xogta waxyaabaha soo socda:
 - I. Xogta caafimaadka xoolaha ee dalka, qaabka loo ilaaliyo, cudurrada khaaska ah ee laga ciribtirayo dalka, goobaha uusan cudur ka jirin iyo shuruucda iyo qaabka loo ilaaliyo qoobaha cudur la'aanta (free disease status).
 - II. Awoodda shaqada Karantiinka xoolaha iyo shuruucda caafimaadka xoolaha saldhigga u ah dhoofinta ama soo dejinta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha.
 - III. Faahfaahinta awoodda Dawladda ee dhinaca xakameynta cudurradda xoolaha ee faafa.
 - IV. Xogta farsamo, khaas ahaan dhinaca farsamada Baarista Cudurrada iyo tallaallada loo isticmaalay qayb kamid ah Dalka ama Dalka oo dhan.

Qod. 3.2.

Gudbinta Warbixinta Cudurrada.

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha waxay Xafiiska Caafimaadka Xoolaha Adduunka (OIE) u diraa:

1. Wargelin iyadoo loogu dirayo Telegraam, Fax ama habka E-mailka muddo 24 saac gudohood laga bilaabo waqtiga la ogaado Lana xaqiijiyo jiritaanka cudurka, gaar ahaan cudurrada ku qoran liiska OIE haddii Gobolka ama aagga uu markii hore ay uga jirin cudurkaasi.
2. Helitan waxyaabo muhiim ah ee cusub oo baaritaan lagu gaaray Lana xiriira cudurrada ku qoran liiska OIE, kuwaasoo muhimad gaar u leh waddamada kale, xag cilmiga ebidemyolojiyadda (epidemiological significance).
3. Gungaar-baaris oo ku meel gaar ee laga gaaray cudurro si gaar ah liis ugu qoran, haddii gungaar-kaas-baaris uu yahay mid muhiimad u leh waddamada kale, marka laga eego xagga cilmiga ebidemyolojiyadda ama cudurka saf-marka ah (epidemiological).
4. Dirista warbixin-bileed ee la xiriirta jiritaanka iyo jiritaan la'aantooda cudurrada ku qoran liiska Xafiiska Caafimaadka Xoolaha ee Adduunka (OIE) iyo kuwa aan ku jirin liiskaas.
5. Dirista warbixin-sanadeedka dhammaan cudurrada ku qoran liiska Xafiiska Caafimaadka Xoolaha Adduunka ee OIE iyo cudur kasta oo kale oo loo arko in uu wax u dhimayo dhaqaalaha bulshada isla markaana muhimadda gaar ah ugu fadhiyo dhinaca Xannaanada Xoolaha.

Qod. 3.3.

Gudbinta warbixinta Cudurrada ee Wadanka Gudahiisa

Dhakhtar, kaaliye-takhtar, takhtarka horumarinta xoolaha, farmashiistayaasha iyo dhammaan qaybaha kale ee ka shaqeeya mihnadda Xannaanada Xoolaha sida cilmi-baarayaasha, ama shaqsigii haysta ama masuul ka ah neef xoola ah kaasoo la rumeeyan yahay ama looga shakisan yahay in uu qabo cudur kamid ah cudurrada la is-qaadsiyo waa in uu xogta cudurkaas u gudbiyo maamulka Xannaanada Xoolaha ee ugu dhow goobtiisa, degmada ama gobolka meeshaasoo la rumeweysan yahay ama looga shakinayo in uu ka dillaacay cudur.

Qod. 3.4.

Xadeynta iyo Qaadista Tallaabooyinka Caafimaad ee laga qaadayo Cudurrada la is-qaadsiyo oo ay warbixitoodu khasabka tahay Tilmaan xadeed.

Wasaaradda Xannaanada Xoolaha waxa ay soo saari kartaa Dekreeto ku caddaynayo in aagagga soo socdo ay yihiin aagag loogu talagalay xakamaynta, ayada oo la raacayo talooyinka iyo tusaalooyinka Agaasinka waaxda caafimaadka iyo Xafiiska Caafimaadka Xoolaha ee Adduunka (OIE).

- a. Aag uusan cudur ka jirin;
- b. Aag baxnaano ama indhaha ku hayn, ee ka baxsan goobta cudur ka jiro ee dalka
- c. Aag dhowrsan oo xoolaha ku sugan, laga wada tallaalay, si loo abuuro aag uusan cudur ka jirin; iyo
- d. Aag uu ka jiro cudur, halka waddanka intiisa kale uusan ka jirin wax cudur ah.

Qod. 3.5.

Tallaabooyinka Caafimaad ee laga Qaadayo Aagga Cudurku ka jiro

1. Wasaaraddu waxa ay ballaarin kartaa ama soo yareyn karaa ama gaabin kartaa amaba uu beddeli kartaa xadka aagga lagu sheegay in uu ka jiro cudur kamid ah cudurrada la is-qaadsiyo.
2. Aagga waa in loo qaataa in uu ka jiro cudur khaas ah ilaa waqti ka badan waqtiga ku xusan koodka Xafiiska caafimaadka xoolaha Adduunka (OIE) uu dilaacay kadib xogtii ugu dambeysay ee laga soo sheegay cudurkaas iyo markii ay waaxda Xoolaha ay si buuxda ugu sameysay ka hortag lana qaaday tallabadii ku haboonayd ee looga hortagayo in aanu cudurkaasi dib u soo noqonin ama aanu u fidin.
3. Waa in dhaqdhaqaaqa xoolaha ee ka-soo-baxaya aagga lagu sheegay cudurka waa in si buuxda loo xakameeyo waana in la tixgeliyo arrimaha soo socda:
 - a. Xoolo cudurku ka muuqdo iyo kuwa cudur-sidayaasha waa in meeshooda logu baabiyo;
 - b. Xoolaha oo B/Buur lagu rari karo iyadoo la geeynayo Goob si deg deg ah loogu qalo xoolahaas kana tirsan goobta isha lagu hayo;
 - c. Si khaas ah xoolaha nool waa soo geli karaan zoonka isha lagu hayo iyo xakameynta ay u dejisay hay'adda Xannaanada Xoolaha. Inta aaneey soo gelin xoolaahaasi aaggaa waa in la soo caddeeyaa in aaneey qabin cudur.
 - d. Xoolaha nooli waa ku noolaan karaan haddii xaaladda is qaadsiinta cudurku uusan xilligaasi jirin.

Cutubka 4aad.

Xakameynta Cudurrada ay khasabka tahay in laga warbixiyo

Qod. 4.1.

Caddeeynta in Cudurro ay ka Jiraan Qayb ka mid ah Dalka Guduhiisa

Wasiirka Xannaanada Xoolaha wuxuu soo saarikaraa Wareegto uu ku Caddeynayo:

- a. In qayb kamid ah Dalka uu ka dilaacay cudur ka mid ah cudurrada ay khasabka tahay in laga warbixiyo (Notifiable disease).
- b. In uu sii-ballaariyo, la yareeyo ama uu beddelo goobtii hore ee lagu sheegay cudurka.
- c. In uu caddeeyo in goobtii lagu sheegay cudurka uusan hadda ka jirin cudurkii hore.
- d. Si looga hortago faafidda cudurka, wuxuu joojin karaa dhaq-dhaqaaqa xoolaha ee ka-soo-baxaya Gobolka, Degmada ama meel kamid ah Gobolkaas uu ka jiro cudurka faafa.

Qod. 4.2.

Awoodda soo saaris Amarro

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha wuxuu soo saari karaa amarro uu siinayo mid kasta oo kamid ah iskuduwayaasha gobolada, maamulayaasha degmooyinka ee wasaaradda ayadaha xannaanada xoolaha iyo takhaatiirta gaarka ah (Public ama Private sectors) “sida ku cad Cutubka 3aad, qodobka 12aad: sida soo socota:

- a. In uu weydiyo cidda ay khusayso in ay soo gudbiso xogta cudur xoolaad jira ama la tuhmay uu Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xooluhu isleeyahay waa ku habboon tahay in lasoo gudbiyo isaga oo tilmaamaya habka loo soo gudbinayo xogtaas cudur xoolaad markaas jira ama la tuhmay inuu aagga ka jiro, iyo si gaar ah habka loo soo gudbinayo xogtaas;
- b. In uu hubiyo in loo hoggaansamay tallaabooyinkii uu Agaasimuhu u arkay inay lagama maarmaan u yihiin ka hortagga iyo kontroolka cudurrada la is-qaadsiyo; ama
- c. In uu qaado tallaabo kasta ee la xiriirta awoodiisa shaqo ama uu isleeyahay waa loo baahan yahay si loo xakameeyo cudurka, loona hirgeliyo xeerhoosaadyada uu soo saaro maamulka Xannaanada Xoolaha.

Qod. 4.3.

Baab’inta/Aasidda Raqda Neef Jirran

Raqda neef qaba cudurrada faafa waxaa lagu baab’inayaa, lagu aasayaa ama lagu jeermi-dilayaa sarkaalka xannaanada xoolaha hortiisa.

Qod. 4.4.

Qalista Xoolaha Jirran

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha ama ciddii kale oo u xilsaaran, kana tirsan waaxda Caafimaadka Xoolaha wuxuu/waxay qoraal ku bixin karaa/kartaa in la qalo neef qaba ama looga shakisanyahay cudur amaba la soo kulamay xoolo jirran amaba soo dhex maray xoolo qabo cudurrada la is qaadsiyo ee ku cad sharcigan.

Qod. 4.5.

Ka-takhalusidda jirka (Qalfoofta/raqda) Neefka la Qalay

Markii neef xoolo ah la qalo/takhaluso waa in jirkiisa (qalfooftiisa) la aasaa ama la iibiyaa hadba sida uu ku taliyo sarkaalka Xannaanada Xoolaha, wixii ka soo baxana waa in la siiyo milkiilaha neefka, marka laga saaro kharashka lagu asturay qalfoofta neefkaas.

Qod. 4.6.

Awoodda Baarista Xoolaha Jirran/buka iyo oonta Xoolahaas

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha, isuduwaha gobolka, maamulka degmada, Kormeere idman, Sarkaal goob shaqo sida takhaatiirta kawaanka, dekada, airaboorka waxay awood u leeyihiin in ay galaan dhul kasta, dhisme, gabbaad, goob, baabuur, diyaarad, doon, ama gaadiid xoolo qaad ama loo isticmaalay daabulaad xoolo ama waxyaabaha ka yimid xoolo, waxay kaloo awood u leeyihiin:

- a. In ay baaraan neef kasta oo laga helo goobtaas si loo hubiyo in neefkasu qabo cudur ka mid ah cudurrada la baahiyo (notifiable decease) ama si loo xaqiqsado in la dhowray qodobada Sharciga xagga nadiifinta iyo jeermi-tirka dhismaha, balbalooyinka, goobaha lagu hayo xoolahaas, ama gaadiidka lagu qaado sida B/Buurta, Doomaha, Maraakiibta, iyo wixii la mid ah.
- b. In ay baaraan Hilibka, qalfoofta, hargaha, iyo wax kasta oo laga sameeyey uunta xoolaha si looga hubiyo jiritaanka cudurrada la is qaadsiiyo sida uu qabo Sharcigani iyadoo ujeeddadu tahay in la xaqiijiyo nadiif ahaanta iyo ka jeermi-tirka dhismooyinka, balbalooyinka, iyo gaadiidka lagu qaado xoolaha sida B/Buurta, Dayaaradaha, Doomaha, Maraakiibta iyo wixii la mid ah.

Qod

4.7. Ka hortagga Cudurka Raabiyada

Qod. 4.7.1.

Xoolaha Buka/jirran ee la doonayo in Warbixin laga gudbiyo, lana Gooni-sooco

Qof kasta oo haysta ama ka masuul ah Eey ama Mukulaal ama neef kasta oo kale oo looga shakiyey cudurka Raabiyada waa in uu:

- a. Burburiyaa neefkaas iyo goobta lagu hayey, la karantiino si wanaagsan, si xoolaha kale ama dadka aanu ula kulmin.
- b. Waa in uu xogta neefkaas si degdeg ah ugu gudbiyaa sarkaalka dawladeed ee ugu dhow kaasoo isaguna si degdeg ah ugu gudbin doona xogta neefkaas maamulka Xannaanada Xoolaha ama takhtarka u xilsaaran arrimahaas.

Qod. 4.7.2.

Waajibaadka Saraakiiska Maamulka, Dhakhaatiirta iyo Baarayaasha Caafimaadka Xoolaha

Sarkaal kasta oo Maamulka Xannaanada Xoolaha ka tirsan iyo Baare kasta kadib markii ay helaan xogta jiritaanka ama shakiga cudurka Raabiyada oo lagu sheegay goob kamid ah goobaha ay u xilsaaranyihiin waa in ay sida ugu dhaqsiiyaha badan ula xiriiraan teleefoon iyagoo u sheegaya

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha faahfaahinta xogta goobta lagu sheegay cudurka Raabiyada.

Qod. 4.7.3.

Awoodda Wasiirka u leeyahay in uu Caddeeyo Goob uu ka jiro Cudurka Raabiyada

Wasiirku, wuxuu wareegto ku soo saari karaa kuna caddeeyn karaa in goob uu ka jiro Cudurka Raabiyada.

Qod. 4.7.4.

Baa'ibinta Xoolaha Qaba Cudurka Raabiyada

Takhtar kasta ama sarkaal kasta oo ka tirsan Maamulka Xannaanada Xoolaha wuxuu dili karaa, gubi karaa eey kasta ama neef kasta oo qaba ama looga shakiyey in uu qabo cudurka Raabiyaha iyo neef kasta oo la kulmay ama uu qaniinay neef qaba ama looga shakisanyahay in uu qabo cudurka Raabiyaha.

Qod. 4.7.5.

Diiwan-Gelinta iyo Ruqsad-Siinta

Qof kasta oo iska leh Eeyo kuna haysta gudaha Maamulka Degmada uu deggan yahay, waa in uu ka diiwaan-geliyaa Maamulka Xannaanada Xoolaha ee Degmadaas. Milkiilayaasha Eeyahaas waa in ay Maamulka Xannaanada Xoolaha ee Degmadaas ay ka qaataan ruqsad la cusbooneysiin karo sanadkiiba mar markii uu milkiiluhu ka keeno warqadda Sarkaalka Xannaanada Xoolaha ee Degmada oo caddeyneysa in eeyahaas laga tallaalay cudurka Raabiyaha.

Qod. 4.7.6.

Laynta Xoolaha dibed-joogga ah

Madaxa Maamulka Xannaanada Xoolaha ee degaanka, isagoo raacaya talada Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha wuxuu amrayaa in la laayo dhammaan eeyaha ku sugan aagga uu saameeyey cudurka raabiyaha, kuwaasoo aysan ku jirin Eeyihii horay loo talaalay loona diiwaan-geliyey loona haysto ruqsad, sida uu qabo sharcigani.

Cutubka 5aad.

Xuquuqda Xoolaha

Qod. 5.1.

Xoolaha waa in loo aqoonsadaa nafley dareen iyo damqasho leh, muhiimna ay tahay in la ilaaliyo qiyamka ay ku leeyahayiin bulshada dhexdeeda.

Qod. 5.1.1.

Dhaqanka Naxariis L'aanta ah ee Lagu Sameeyo Xoolaha

1. Qofna waa in uusan:
 - a. Si naxariis la'aan ah u dilin, ula dhaqmin, xoog u wadin, rarka ka badin, jir dilin, ka careeysiin ama cabsi gelin neef xoolo ah.
 - b. Isticmaalin neef jiran, dhaawacan ama aan awood xoog leh lahayn;
 - c. Ku socodsiiin jid jajaban ama Buur dheer asagoo raran oona awood u lahayn in uu ku fuulo buurta ama uu ku socdo jidka jajaban, taasoo u keeneysa in uu neefku dhibtoodo;
 - d. Cunto iyo Biyo la'aan dhigin ilaa heer uu baaba'o neefku.

- e. Milkiilaha neefka xoolaha uusan dayicin markii uu neefku jirrado, asagoo daaweyn kara neefkaas.
 - f. Kuwa kale oo fara badan oo dhaqan-xumo ah oo lagula dhaqmo neefka xoolaha ah.
 - g. in aan lagu heysani karin goobo aan munaasib ku aheen xoolaha gaar ahaan duur joogta ayadoo daawashadooda iyo ka ganacsi. loo isticmaalaayo.
 - h. si sharci daro ah loo ugaarsanin duur joogta, aan laga ganacsanin ayagoo nool, haragooda iyo faanahooda.
2. Sarkaalka Xannaanada Xoolaha, wuxuu awood u leeyahay in uu ka hortago dhaqamadaas aan loo baahnayn ee loo geysanayo xoolaha haddii wax laga maqli waayana uu weydiisto Booliska ama ciddii kale ee ka tirsan Dawladda waxna ka qaban karta arrintaas si loogu fuliyo loona waafajiyo sharciga iyo kala-dambeynta qofkaas ka galay dembiga neefka xoolaha ah.

Qod. 5.2.

Arxan-darrada Waqtiga Gowraca

Waxaa reeban in meel kasto xoolaha lagu qalo, ama la sameeysto kawaan gowrac, ama goob xoolaha lagu laayo si naxariis daro ah iyadoon amar wasaaradeed laga heysan, iyadoo loo dhibaateeyo sida:

1. Marka la bireynaayo xoolaha waa in middi afeysan oo markiiba nafta ka gooyneeysa lagu bireeyo, xoola kale hortood aan lagu gawracin.
2. Waa in si naxariis leh loola dhaqmaa ee aan la dhihin maadaama la qalayo cawska iyo biyaha lagu khasaarinin qofku waxaa difaaci u noqon kara maxkamad inuu caddeeyo, sida ku cad faqradda 1aad qodobkan:
 - a. Haddii uu ahaa mid caqiiddo diimeed rumeysan oo jideeyey in neefka uu ahaa in lagu gowraco jidkaas iyo xayawaanka lagu gowracay meel kale oo aan ahayn guriga gowraca ama goobta qalliinka loogu talo-galay; iyo
 - b. Hadduu yahay xayawaanka la gowracay mid shakhsi ama si gaar ah loo quudanayo ama loo qalanayo oo uusan ahayn mid hilibkiisa la gadaayo ama lays-dhaafsanayo oo la kala bedelanayo.

Cutubka 6aad.

Dhoofinta ama Soo-dejinta Xoolo iyo Wax ka-soo-baxa Xoolo

Qod. 6.1.

Hay'adaha u Xilsaaran

Wasaaraddu waxay yeelanayaa mas'uuliyadda habeynta dhoofinta iyo soo-dejinta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa, iyo fulinta hawlaha caafimaadka xoolaha iyadoo la raacaayo hannaanka caafimaadka xoolaha ee caalamiga ah.

Qod. 6.2.

Soo-dejinta Xoolaha iyo Waxyaabaha ka-soo-baxa Xoolaha

1. Xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha lama soo gelinkaro dalka iyadoo aan ruqsad laga haysanin Agaasimaha Waaxda caafimaadka xoolaha (Chief Veterinary Officer).
2. Shatiga ogolaashada waa in lagu xusaa nooca xayawaanka ama badeecad ahaan waxa xoolaha ka-soo-baxay, asalka, tirada, nooca gaadiidka iyo meesha uu ka soo degaayo.
3. Soo dejinta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxaha xoolaha waa inay la socotaa shahaadada caalamiga ah ee caafimaadka xoolaha oo dhaqangal ah kana soo baxday saraakiisha caafimaadka xoolaha ee waddanka wax soo dhoofinaayo.

4. Xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha lagama bixin karo meesha ay ku soo dageen ilaa shatiga iyo waraaqadaha qeexaya ogolaashaha soo dejinta ama caddeynta dhoofinta oo loo gudbinaayo sarkaalka kormeerka.
5. Shahaadada dhoofka xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha waa inay ku caddahay meesha ay ka yimaadeen inaysan ka jirin cudurrada faafa ama cudurrada lays-qaadsiiyo. Shahaadada caddeynta caafimaadka xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha oo ka soo baxday Dhakhtarka xoolaha oo cadeynaaya in xayawaanaadka caafimaadkoodu wanaagsanyahay oo aysan qabin cudurrada faafa iyo cudurrada lays-qaadsiiyo ayna weheliso warqadda dhoofka xoolaha. Caddeymahaas oo dhan waa inay leeyihiin taariikh aan ka badnayn toban maalmood laga bilaabo taariikhda dhoofka.
6. Soo dejinta xayawaanaadka bahda la ah Eeyaha iyo bahda la ah Mukulaalaha sida (bisad, libaax, shabeel iyo haramcad) waa in ay wehelisaa shahaado uu ku sixiixan yahay Dhakhtarka xoolaha oo caddeynaysa in xayawaanaadkaas lagu sameeyay tallaalka kahortagga cudurka Rabies, caddeyntaasna waa inay taariikhdeedu ka horeyn seddex sano kana dambeyn lix bilood kahor taariikhda soo dejinta.
7. Soo-dajiyaha waa in uu ku qanciya sargaalka kormeerka, xayawaanka la soo dejinaayo in uusan la kulmin xoola jiran ama cowskii ama cuntadii aan feyqab aheyn intii uu ku jiray mudada safarka
8. Sargaalka Kormeerka wuxuu waajibaadka la wadaagaa Sarkaalka Caafimaadka Xoolaha, haddii xayawaan la soo dejiyay uu asiibo cudur ama looga shakiyo ama cudurka xoolaha uu la xiriiro ama uusan lahayn shahaadooyinka kala duwan ee caafimaadka xoolaha, waxay noqonaysaa in la baabi'yo ama loo aqoonsado neef jirran.
9. Xayawaanka bahda la ah Eeyaha (dhurwaa, dawaco, weer, uubato. iwm) ama bahda la ah Mukulaalaha sida (bisad, libaax, shabeel, haramcad, iwm) kuwaas oo la soo geliyo waddanka, iyagoo aan lahayn talaalka ku habboon ee ka-hortagga cudurka Rabiyaada, waa la karantiinayaa oo la faquuqayaa iyadoo kharashaadkana uu bixinayo milkiilaha, ogolaanshaha waxaa bixinaya maamulaha caafimaadka xoolaha(CVO) waqti aan ka yareyn toban maalmood kana badnayn lix bilood.
10. Xayawaanaadka la soo dejinaayo waa in sida ugu dhaqsaha badan loogu soo gudbiyaan shatiga iyo shahaadada lagu qancaayo madaxa dhoofka xoolaha wada kasta ha ku yimaadeen (bad, cir dhul) lana marsiiyo muddada karantiinka, kharashka muddada karantiinka uu bixinaayo milkiilaha,
11. Xayawaanka waxa ka-soo-baxa ee la soo-dejinayo oo loogu talo-galay inuu aadanaha quuto, xoolaha cunaan, ama beeraha loo adeegsado ama warshadaha lagu isticmaalo, taasoo sargaalka kormeerka u arko inaysan u wanaagsaneyn caafimaadka dadka iyo xoolaha, ama aysan wehelin shahaadada caalamiga ah ee caafimaadka oo ka soo baxday maamulka caafimaadka xoolaha CVO, waxay sabab u noqonaysaa in dib loogu celiyo waddankii ay asal ahaan ka yimaadeen, si badbaada leh ama lagu baabi'yo.

Qod. 6.3.

Dhoofinta Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa

Qod. 6.3.1.

Wada-shaqeynta Hay'adaha Dawladda

Wasaarada X. xoolaha waa in ay wada shaqeyn buuxda kala yeelato wasaaradaha kale ee khuseysa dhoofka xoolaha iyo waxa ka soo baxa xoolaha sida W. Maaliyadda, W. Ganacsiga, W. Gaadiidka

badda iyo dekadaha, W. gaadiidka cirka iyo dhulka iyo W. Amniga. si loo meel mariyo sharciga vet. Code.

Qod. 6.3.2.

Mamnuucidda Dhoofinta Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa Xoolaha

Waxaa mamnuuc ah dhoofinta xoolaha dhedig ee wax soo saarka leh, ilmo uur jiiif ah, ukun, labeeb, ukun qolofeedyada, ama xayawaanka duurjoogta ah oo gaarka u ah bii'adda isku xiran ee Soomaaliya leedahay ama xayawaanaadka khatarta ugu jira inay dabar go'aan.

Qod. 6.3.3.

Oofinta baahida dalka wax loo dhoofinaaya

Wasaarada waxey oofineysaa shuruudaha gaarka ah ee dalalka wax loo dhoofinaayo ayada oo aan laga tageeyn qaanuunka ganacsiga Caalamiga ah

Qod. 6.3.4.

Kaabayaasha Xakamaynta, fududaynta dhoofinta iyo soo-dejinta

1. Fududeynta kaabayaalka dhoofinta iyo nidaamka Xakamaynta habsami u dhoofka xoolaha, iyo dhaqdhaqaaqa xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha ee heerka caalamiga ah waxaa ka mid ah:
 - a. Dekedaha ay soo galayaan;
 - b. Marinka dhoofka xoolaha waa in loo diyaariyaa waddo, biyo, calf iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah
 - c. Haysmo dhul lagu hayo ama meel lagu nasiyo dhoofitaanka xoolaha ka hor;
 - d. Ogolaanshaha goob lagu gowroco xoolaha la dhoofinaayo si hilib looga helo;
 - e. Saldhig Kaarantiin
 - f. Hayn meelo xoolaha lagu nasiyo dhoofka ka hor (marshalling yards)
 - g. Bar uruurinta loogu talagalay in lagu ururiyo waxyaabaha xoolaha ka-soo-baxa gaar ahaan maqaarka, qoobka iyo lafaha iyo
 - h. Wixii kale ee fududeyn ah oo ku saabsan xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha oo xad siireed u ah, dekedaha badda iyo garoomada diyaaradaha.
2. Maamulka dhakhaatiirta waxay ka hawlgelayaan kaabayaasha dhoofinta, fududeymaha ama aasaasidda waxyaabaha ku qoran farqadda 1,aad ee sare ku xusan iyo howlgallada kale ee la midka ah taasoo hoos imaanaysa masuuliyadda iyo awoodaha uu leeyahay sarkaalka daaweynta xoolaha.
3. Maamulka Xannanada xoolaha wuxuu sameynayaa wax kasta oo suuragal ah, si loo helo loona hubiyo hawlaha fududeynta iyo asaasidda goobaha loogu tala galaya adeeggyada dhoofka xoolaha sida dhakhaatiirta xoolaha, shaqaalahooda iyo qalabka waxaayana suura gelineysaa:
 - a. Quudinta iyo waraabinta xoolaha;
 - b. Sameynta rugo baarid caafimaad iyo helitaanka qalab lagu baaro xoolaha, qalfoofta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha.
 - c. Baaritaaka iyo gooni u soocidda xoolaha jiran ama laga shakiyo inuu asiibay cudur iyo
 - d. In gaadiidka daabula xoolaha iyo wax xoolaha ka-soo-baxa lag jeermi tiro si loo baabiyo bakteeriyada iyo wixii lamid ah.
4. Siyaasadda wasaaradda ee hirgelinta hawlaha iyo fududeynta maamulka ama hawlaha gundhiigga u ah wanaagga waxay horumarinaysaa hay'adaha gaarka loo leeyahay (Private

Sector) maamulka ganacsigooda iyo cimri dheerida hawlhooda. sidaas darteed, Maamulka dhakhaatiirta waa inuu jideeyaa hannaan hoostaga sharcigan:

- a. Diiwaangelin, shati bixinta iyo indhaindheynta habsami u socodka fududeynta maamulka iyo assaasidda iyo u carbin shaqsiyaad ku hawlanaado dhaqdhaqaaqa hawlgallada;
 - b. Horay u diiwaan gelinta fududeynta howgallada gaarka ah iyo aasaasidda iyo shaqooyinka shaqsiyaad ama shirkadaha markay leeyihiin sababo ku filan oo la soo caddeeyey in aaneey ku habooneeyn in ay qabtan shaqooyin horay loogu ogolaaday ama loo ansixiyey sababahaasoo keenaya in la joojiyo shaqooyinkii iyo goobihii horay loogu ogolaaday ka shaqsi iyo shirkad ahaan intaba, iyo
 - c. Hubinta in hawlaha caafimaadaka xoolaha iyo in habka baarista iyo shahaada- siinta xoolaha ay yihiin kuwo la dhaqan geliyey lana xoojiyey.
5. Markii la fududeynaayo ama la aasaasayo hab maamul ganacsi ee shaqsiyaad gaar ah ama shirkado, waa in ay fuliyaan heerka nadaafadda taasoo uu weydiisanaayo sargaalka Xannaanada Xoolaha ee loo xilsaaray hawlahaas, kaasoo sharcigu uu u siinayo awood uu ku fuliyo baaritaannada caafimaadka xoolaha iyo goobaha lagu xanaaneeyo, waana in:
- a. Mamnuucid, yareyn, xadeyn, ama sharciyeen soo gelitaanka ama ka fogeynta goobo qaas ah ama u xadeeynta xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha meelo cayiman;
 - b. Mamnuucid, yareyn, xadeyn, ama sharciyeeyn wadiiqada shaqsiyaadku ku soo geli karo goobo la cayimay ama la xadiday;
 - c. U sameeyn calaamado rasmi ah oo lagu garto xoolaha, waxa ka-soo-baxa xoolaha, kontaynarada, xerooyinka, qalabka iyo gaadiidka lagu qaado;
 - d. Hirgelinta amarro xoolaha lagu baarayo, dhiig ama dheecaanno looga qaadayo ama lagu karantiinayo;
 - e. Qabashada ama amar ka bixinta in la fuliyo la socodka calaamadaha cudurrada, shaybarr u dirid, talaalid iyo ka hortegid cuduradda ama daaweynta xoolaha, habeynta waxa ka-soo-baxa xoolaha iyo jeermi-tirka goobaha, qalabka, meelaha lagu hayo xoolaha iyo gaadiidka lagu qaado;
 - f. Soo qaadista Sambalo/Walxo/ cayinno oo loogu talo-galayo in la baaro cudurka, nadaafadda ama xakameynta heerka tayada ama sida loo fuliyey sharciga caafimaadka xoolaha iyo in uu u gudbiyo cayinahaas shaybaarka lagu baarayo;
 - g. La wareegid xoolo iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha ama sababaha keeni kara la wareegidaas;
 - h. Burburin xoolo iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha ama waxa dhalin kara burburintaas in ay timaado;
 - i. In uu soo saaro ogolaanshaha dhaqdhaqaaqa ama shahaadada caafimaadka xoolaha markii ay ku habboontahay.

Cutubka 7aad.

Daabulidda Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa Xoolaha

Qod. 7.1.

Shuruudaha Guud Ahaaneed

1. Dhammaan gaadiidka lagu qaado xoolaha iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha sida: Doomaha, Maraakiibta iyo Baabuurta ee iskaga gooshaya wadanka gudihiiisa ama dibadiisa waa in, ka

sokow ogolaanshaha sharciyeed ee dalalka, ay wataan ogolaanshaha dhaqdhaqaaqa ay soo saartay hay'adda Xannaanada Xoolaha. Ogolaanshaha dhaqdhaqaaqa waa in ay ka muuqataa tirada ugu badan ee ku cad sharcigan xoolaha iyo in ay waafaqsanyihiin gaadiidkaasi heerka dhowrista xuquuqda xoolaha.

2. Gaadiidka ama kontaynarada loo isticmaalo qaadista xoolaha waa in hab dhiskooda uu u dhisanyahay iyo in uu ku haboonyahay in uu qaadi karo culaabta xoolaha, xaqiijinta bad baadada xoolaha iyo xuquuqda xoolaha mududada ay ku jiraan safarka iyo in uu u sahalayo gelitaanka shaqaalaha ka shaqeeynaya xoolaha mudada safarka.
3. Xooluhu waa in ay helaan baaxad ku filan oo ay fariisan karaan, haddii aanu dalkaasi u leeyahay sharci u gaar ah arrintaas. Waa in la kala saaro xoolaha meeshii looga baahanyahay kala saaristooda sida ay isu leeyihiin xoolahaasi iyo in xoolaha geesaha leh iyo kuwa aan lahayn la kala saaro.
4. xoolaha marka la saarayo gaadiidka waa in laga raraa goob farsameysan loogu talagaley , si loo ilaaliyo xuquudda xayawaanka.
5. Gaadiidka qaadaya xoolaha waa in ay leeyihiin tiro ku filan oo shaqaalaha ka shaqeeya xoolaha mudada safarka, biyo ay cabaan, cunto ay cunaan iyo qalab loo goglo sida ku xusan sharcigaan iyo in ay waafaqsanyihiin heerarka caalamiga ah.

Qod. 7.2.

Ruqsadaha iyo Shahaadooyinka Xoolaha la Daabulayo

1. Lama Dhaqaajin karo lamana daabuli karo xoolo haddii aaneey ka wadan ogolaansho sida waafaqsan dhaq-dhaqaaqaas ama daabuleeyntaas hay'adda Xannaanada Xoolaha.
2. Codsiga ogolaanshaha dhaq-dhaqaaqa gaadiidka dhulka waa in uu sameeyaa milkiilaha gaadiidkaas waana in uu ku caddeeyaa codsigiisa mugga xoolo uu qaadi karo, tankiisa iyo wixii kale ee si gaar ah ugu baahanyahay maamulka x. xoolaha.
3. Codsiga gaadiidka badda iyo cirka waa in ay la socotaa naqshado iyo taariikhda ku saabsan dhismaha gaadiidkaas, qalabka, tirada shaqaalaha iyo culeyska (tanka) markabkaas dayaaradaas ay qaadi karaan.
4. Haddi Maamulka Xannaanada Xoolaha uu ku qanco in gaadiidkaas uu ku haboonyahay in uu daabulo xoolo wuxuu siinayaa ruqsad muddo hal sana ah taasoo la cusbooneysiin karo sannad walba. Haddi waqti uun lagu sameeyey is beddel gaadiidkaas waxaa lagama maarmaan noqonaya in codsi cusub uu sameeyo milkiilaha gaadiidkaas isagoo soo caddeynayaa is beddelkii lagu sameeyey gaadiidkaas inta aan la siinin ruqsadda ka hor.
5. Markii la weeydiisto Hay'adda (Xafiiska) Xannaanada Xoolaha waxeey siineysaa milkiilaha gaadiidka, Markabka, dhoofiyaha iyo midka loo dirayo badeecadda ama wakiilkooda waxyaabaha soo socda:
 - a. Shahaado caddeeyneeysa talaabooyinka laga qaaday dhinacyada (Jeermitirka, dhowrsanaanta iyo wixii kalaba) ee lagu fuliyey dhammaan maraakibtaas, qeybaha B/Buurta ee lagu sameeyey daaweeynta, habka la isticmaalay iyo sababaha dhaliyey in laga qaado tallabooyinkaas. iyo
 - b. Shahaado muujineeysa taariikhda uu yimid gaadiidkaas qaaday xoolaha iyo taariikhda uu baxay intaba.

Qod 7.3.

Shuruudaha loo Baahanyahay Daabulidda ka hor, Inta Daabulidda lagu guda jiro, Raridda iyo Dejinta Xoolaha.

Qod. 7.3.1.

Daabulidda ka hor

1. Inta aan xoolaha lagu habeeynin gaadiidka korkiisa waxaa lagama maarmaan ah in la diyaariyo calafka xoolaha, biyaha, gogosha, hawasiinta, qalabka Xanaaneeynta xoolaha iyo daawooyinkooda kuwaasoo la isticmaalayo mudadda ay xooluhu ku jiraan safarka.
2. Dhammaan goobaha loo isticmaalayo raridda ka hor ee Karantiinka xoolahana lagu haayay inta aaneey safarin ka hor waa in ay noqdaan meel uu gacanata ku hayo sarkaalka ilaalinta iyo xakameynta cudurrada oo ka tirsam Hay'adda Xannaanada Xoolaha iyo shaqaale loo carbiyey ka war qabka xoolahaas.

Qod. 7.3.2.

Haynta Xoolaha inta aan la Rarin ka hor

1. Meeshii looga baahanyahay, maalmaha haynta iyo raridda waa kala beddelnaan karaan waxeeyna ku xirantahay:
 - a. Baarista, daaweynta iyo tallaallidda xoolaha lagu fulinayo mudadda ay ku jiraan meesha ay uga sii gudbayaan meel kale, goobta ama karantiinka lagu haynaayo sida lagula heshiiyey dalalka loo iib geeynaayo xoolaha.
 - b. Shuruud horay loogu heshiiyey oo ah in laga beddelo xoolaha qaabka calaf siinta iyo biyo siinta sida (laga beddelo habkii daaqsiiinta oo loo beddelo calaf siin)
 - c. Haddii loo baahdo in xoolaha la kala sooco, laga bixiyo neefkii aaneey fiicneeyn dabeesacaddiisa, dhisnaanta jirkiisa ama caafimaad-xumo awgeed aanu ka bixin Karin safarka.
 - d. Waqtiga loogu talo-galay safarka, iyo
 - e. Baahida loo qabo in ay xooluhu loo bahanyahay in ay nastaan muddo ilaa meesha lagu haynayo xoolahaas.
2. Goobta ama Karantiinka lagu siihaynayo xoolaha inta aanan la dhoofin ka hor waa in aysan ka fogaanin dekadada xoolaha laga rarayo.
3. Sarkaal aqoon u leh xoolaha ama ku wanagsan shaqda kormeeridda kana tirsan Hay'adda Xannaanada Xoolaha waa in uu hubiyaa in xoolahaasi xaaladda caafimaadkooda uu wanaagsanyahay mudadda ay ku jiraan safarkana u adkeysan karaan.
4. Waa in la diiwaangeliyaa nooca xoolaha, sanadkooda, tirada xoolaha la raray ay ku jiraan magaca milkiilaha, goobta ay ka ambabaxayaan iyo goobta loo raray.

Qod. 7.3.3.

Raridda iyo Dejinta Xoolaha

1. Xoolaha waa in aan la rarin inta uu ka dhamaystirayo dokumentiga looga bahaanyahay sarkaalka ugu xilsaaran arrimahaas hay'adda Xannaanada Xoolaha.
2. Dejinta iyo raridda xoolaha waa in loo fuliyaa habka ugu dhibka yar ee aaneey xooluhu ku qaadeeyn argagax, waana in rarkaas sida ku haboon waqti yar ka hor inta aanu markabku ka furan dekadada laga raray xoolaha.
3. Sarkaalka Xannaanada Xoolaha ama qofkii kale ee u xilsaaran awoodna loo siiyey sida sarkaalka kormeera raridda xoolaha waa in uu kormeeraa, hubiyaana qaabku uu u socdo rarka

iyo tirada xoolaha hal meel lagu rarayo waana in uu haddii u arko neef aan ku habooneeyn in lararo uu ka saaraa.

4. Xoolaha lagu rarayo khaan walba ama xero kasta oo kamid ah Markabka, B/Buurka ama Doonta waa in loo raraa xoolaha hadba sida ay isu leeyihiin nooc ahaan iyo cabir ahaan intaba.

Qod. 7.3.4.

Waqtiga Rarka lagu Guda-jiro

1. Xoolaha waa in loo daabulaa qaabka ugu habboon iyadoo la qaadanayo dariiqa tooska ah iyo xowliga ku habboon.
2. Mudada safarka lagu jiro haddii neef dhinto, saxaradiisa iyo kaadidiisa waa in loo maamulo qaabka looga hortegi karo in cudur iskaga gudbo xoolaha iyadoo la raacayo dhammaan shuruucda la xiriira ilaalinta caafimaadka iyo jawiga xoolaha.
3. Xoolaha waa in aay raacaan shaqaale u tababaran xirfadda ilaalinta xoolaha kuwaasoo ka diiwaan gashan haystana shaahadada Maamulka Xannaanada Xoolaha, kuwaas oo qabanaaya:
 - a. Ilaalinta xaaladda caafimaadka ee rarkaas;
 - b. Hubinaya in xooluhu helaan cunno, biyo, gogol iyo wixii la mid ah, haddi loo baahdana weeydiisan kara caawinaad dhinaca Xannaanada Xoolaha;
 - c. Hubinaaya in meesha ay xooluhu ku jiraan ay ku haystaan hawo ku filan;
 - d. Diiwaan geliya mudadda safarka wixii mashaakil ah ee la xiriiro dhinaca caafimaadka xoolaha, dhaawac, dhimasho iyo daaweyn la daaweyey xoolaha, kadibna waa in uu markiiba warbixinta u gudbiyaa Sarkaalka Xannaanada Xoolaha ee shaqada ku leh arrintaas.
4. Meeshii ay suurta gal ka tahay xoolaha waa in la nasiyaa waqtigiiba mar taasoo ku xiran nooca gaadiidka kaasoo u baahan kara in la helo qalabka dejinta xoolaha
5. Mudadda safarka dhulka, badda ama cirka, neef walba waa in uu helaa baaxad ku filan oo lagu siin karo cuntada, biyaha isla markaana uu ku nasan karo.

Qod. 7.4.

Talooyin u gaar ah Qaababka Daabulidda

Qod. 7.4.1.

Lugeysiinta Xoolaha

1. Xoolaha waa in ay la socdaan shaqaale ku filan ee aqoon iyo waayo aragnimana u leh ilaalinta xoolaha si wanaagsan u kala yaqaan jidadka ay xoolahu ku safrayaan kuwaaso ay ku jiraan goobaha ay xoolaha ku nasan karaan, ku sii istaagi karaan kuwaasoo uu horay u qeexay mas'uul ka tirsan Hay'adda Xannaanada Xoolaha.
2. Xoolaha waa in ay helaan waqti ay daaqi karaan waana in la siiyo cunto iyo biyo ku filan ugu yaraan maalintiiba hal mar taasoo ku xiran nooca xoolaha ay markaas yihiin.
3. Xoolaha waa in la safriyaa xilliga ugu habboon, waana in aan xoolaha lagu kaxeeynin xawli ka dheer midka ay ku socon karaan sida caadiga ah.

Qod. 7.4.2.

Ku-daabulidda Gaadiidka Dhulka

1. Baahida baaxadda ay u baahanyihiin xoolaha waa in uu tilmaamaa sarkaalka Xannaanada Xoolaha si waafaqsan shuruucda caalamiga ah waana in loo helaa neef kasta boos ku filan oo uu si caadi ah u istaagi karo.
2. Xoolaha ku raran baabuurta waaweyn ee lugaha baddan waa in laga ilaaliyaa xoolaha khanka ama raarka hoose ku jira in ay ku soo dhacaan saxarada iyo kaadida ka imanaya kuwa kor saaran.
3. Mudadda uu gaadiidku taaganyahay waa in xoolaha laga ilaaliyaa qoraxda sida tooska ah ugu dhaceeysa.
4. Darawaliinta wada Gaadiidka xoolaha waa in ay ilaaliyaan xuquuqda xoolaha ay sideen, waana in lagula xisaabtami karaa wixii ku yimaada xoolahaas sida uu qabo sharcigan xoolaha.
5. Waa in aan xoolo lagu qaadin Gaadiidka Dadweeynaha waana in Hay'adda ilaalada gaadiidka (Traffic control) ay hubisaa arrintaas.

Qod. 7.4.3.

Wax Ku-daabulidda Gaadiidka Badda

1. Markab ama doon kasta oo qaadaya xoolo waa in uu leeyahay shaqaale ku filan oo ilaaliya kalana sooca xoolaha muddada ay safarka ku jiraan, lehna Hawo, Iftiin, raar ama Khanan waasac ah, meel saxarada iyo kaadidu ka baxaan, biyo la cabi karo, raashiink ku filan xoolaha iyo waxyaabaha looga dhigi karo gogol meesha ay xooluhu ku jiraan sida uu qabo sharciga iyo xeerarka hoos imanaya sharcigan.
2. Xooluhu waa in ay haystaan cunto iyo biyo dheeri ah haddii ay markabka ku timaado cillad farsamo iyo amuuro kalaba oo ay cunaan ama cabaan waqtigaas dheeriga ah ee soo baxay.

Raashinka iyo biyaha ey u baahan karaan xoolaha maalintii

Nooca xoolaha	Biyaha (Lite)	Calafka (Kg)
Geela	50	12
Lo'	40	8
Ari	5	2

3. Xoolaha waa in ay helaan baaxad ku filan isla markaana ka dhowrsan yihiin cimilo kasta oo jirta waana in ay markabka ama doonta si fiican ugu raranyihiin sida uu qabo sharcigan
4. Geela, Lo'da iyo Fardaha waa in lagu raraa safarka badda meesha ugu koreeysa
5. Goobo khaas waa in uu leeyahay markabka ama doonta oo xoolaha lagu kala saaro markii ay timaado baahidaasi.

Qod. 7.4.4.

Wax Ku-daabulidda Gaadiidka Cirka

1. Ku daabulidda xoolaha gaadiidka cirka waa in uu waafaqsan yahay sharciga daabulidda xoolaha nool ee hay'adda Caalamiga ah ee Gaadiidka Cirka (IATA) sida ku cad talooyinka Hay'adda Caafimaad Xoolaha Aduunka ee OIE.
2. Hawl galka caafimaadka xoolaha, dhiig ka qaadistooda, talaalkooda iyo shahaadada caafimaadka xoolaha waa in xilli hore loo sameeyaa inta ka horeeysa kicitaanka dayaaradda.

3. Diyaaradda waa in ay ku diyaar yihiin biyo iyo calaf ay xooluhu cunaan wixii ka baddan lix saacadood oo duulimaad ah.
4. Haddi uu neef dhinto mudada ay xoolaha saran yihiin dayaaradda waa in horay loo sii ogeysiisaa Dawladda ama Hay'adda ku shaqada leh ee wadanku ay xooluhu u socdaan.

Qod. 7.5.

Ruqsadaha iyo shahaadooyinka Daabulidda Xoolaha.

1. Marka xoolaha lagu daabulayo gaadiidka dhulka waa in milkiilaha B/Buurka uu sameeyaa codsi uu kaga codsanayo Maamulka Xannaanada Xoolaha asagoo tilmaamaya mugga B/Buurka uu qaado tirada xoolaha uu qaadi kara iyo wixii kale ee lagama maarmaan u ah.
2. Marka xoolaha lagu daabulayo gaadiidka Cirka ama Badda waa in codsiga ay soo qoranayaan milkiilayaasha gaadiidkaas ay soo raaciyaan naqashadaha iyo waqtiga la sameeyey gaadiidkaas, xamuulka ay qaadi karaan, shaqaalaha la socda sida waafaqsan sharciga Caalamiga ah ee gaadiidka daabula badeecooyinka gaar ahaan xoolaha.
3. Maamulka Xannaanada Xoolaha waxeey siin kartaa ruqsad gaadiidka ku haboon in uu qaado xoolo muddo lix bilood ah oo sanadkiiba mar la cusbooneysiinayo sida ku cad qodobada 35 iyo 36 ee sharcigan.

Qod. 7.6.

Waxyaabaha u gaarka ah Uunta Xoolaha

1. Konteeynarrada lagu wado Uunta Xoolaha waa in ay leeyihiin meel laga arki karo waxa ku jira gudaha sida dariishado ama duleello waana in Konteeynarkaasi uu furaa oo keliya Sarkaalka Maamulka Xannaanada Xoolaha ee qaabilsan shaqadaas si uu u qaado tallaabo uu uga hortagayo in khatari ka timaado kontaynarkaasi.
2. Konteeynarrada waa in lagu shubaa hal nooc oo xoolo ah ama badeecooyin aan iyagu waxba isu dhimeeynin haddii hal kontaynar lagu wada shubo.

Cutubka 8aad.

Fayadhowrka Hilibka

Qod. 8.1.

Meesha Loo cayimay

1. Wasiirka asaga oo soo saaraya wareegto (xeer wasiir) wuxuu caddaynkaraa in goob kasta oo ah kawaan, guri xoolaha lagu qalo ama meel kastoo kale oo lagu qalo xoolo loogu talagay in dadku quuto, in ay noqoto meel loo cayimay oo leh barista fayadhowrka hilibka.
2. Waaxda caafimaadka waxa ay shaciyeyneysaa:
 - a. Shati bixinta, kormeeridda iyo habeynta goobta ama guriga qalliinka xoolaha iyo dhismaha-wareegiisa halkaasoo hilibka lagu hagaajinaayo si dadka uu u quut, dhowridda nadaafadda iyo heerka fayadhowrka guud ee guriga qalliinka iyo wareegga dhismihiisa;
 - b. In si gaar ah loo ilaaliyo hababka caalamiga ah ee keydinta iyo daabulinta gaadiid hilibka xoolaha;
 - c. Magacaabis xerfadlayaal, kormeerooyal, shati bixiyaal si ay u fuliyaan hawlaha barista hilibka ee ku cad xeerhoosaadyada.

- d. Jideynta hannaanka qidmo bixinta si loo dhawro waxa qabsoomay ee hoos tagaya sharciga iyo;
 - e. Jidaynta ganaax lagu mutaysanayo ku-xadgubka (jebinta) xeerhoosaadyada iyo wareegtooyinka.
3. Waxaa la samayn karaa xeerhoosaadyo kawaannada iyo goobaha loo isticmaalo habaynta hilibka. Waxaa kale oo xeerhoosaadyo loo samayn karaa noocyada iyo derejooyinka ay kala leeyihiin kawaannada iyo goobaha xoolaha lagu qalo.

Qod. 8.2.

Baarista

1. Marka laga reebo xaalad deg-deg ah, xoolaha lagu gowracay meesha loogu talo-galay, waa in qofka gowracaya uu ahaado mid uu kormeerayo sargaalka kormeerka iyo baarista marka loo eego hab-dhaqanka sharciga.
2. Gowraca kadib, sargaalka baarista, haddii uu ku qanacsanyahay raqda neefka la qalay uu ku habboon yahay cunista dadka, waa in uu ku dhajiyaa jaan ama calaamad muujinaysa in neefka la qalay uu waafaqsanyahay qaanuuka hoos imaanaya sharcigan.

Qod. 8.3.

Awooda Haynta iyo Ka-takhlusidda Raqda ama Qalfoofa Neef Dhintay

Sargaal kasta oo qaabilsan caafimaadka xoolaha (VO) ama sargaalka barista (IO) fikirkiisa waa ku amri karaa in la hayo ama la tuuro ama la baabi'yo raqda neefka la gowracay, haddii uusan ku habboonayn cunista dadka

Qod. 8.4.

Qodobka Habka Barista Hilibka

Habkaan baarista hilibka waa in uusan fulintiisa saameyn ku yeelan qaanuunka cutubka 4aad ee sharcigaan oo khuseeya ka hortaga cudurada la cayimay ee xoolaha.

Cutubka 9aad.

Dhakhatiirta Xoolaha oo aan dowliga aheyn(Gaarka ah)

Qod. 9.1.

Waajibaadkooda Dhakhaatiirta Xoolaha aan dowliga aheyn

1. Dhakhtarka caafimaadka xoolaha oo la diiwaan geliyay iyo kuwa Ruqsada ama Ogolaanshaha shatiyada la siiyay, waxaa la siin karaa qandaraas uu ku fulin karo hawlaha loo xilsaaray, asaga oo wakiil uga ah waaxda caafimaadka sida sharciga qabo marka ay fulin karin weyso daruufo joro awgeedasiida .
2. waa in si cad loo kala qeexo howlaha kala duwanaanshaha doorka hawlaha dhakhtarka dowliga aheyn(private) iyo kuwa dowliga ah(public) iyadoo hawlaha lagula heshiiyey dhakhaatiirta gaarka ahaan dowliga aheen uu noqon doono hab qandaraas oo qoraal lagu cadeynaayo si loo qeexo waajibaadka shaqo ee dhakhatiirta dowliga ahi iyo kuwa dowliga aheen. Dulucda nuxurka qoraalkan waa in waa in si cad loo kala qeexaa ka la duwanaanshaha doorka uu ku leeyahay howsha dhaqtarka aan dowliga aheen iyo ka dowliga ahi, ayadoo hab qoraal ahi lagu muujinaayo howsha lagula heshiiyey dhaqtarka aan dowliga aheen.

- a. Dhakhaatiirta aan dowliga aheen (Private Veterinary) waxay wada shaqeyn guud la yeelan karaan wasaaradda iyo ganacsato. in ay ku ekaadaan hawlaha wasaaradda u igmatay.
- b. Waa inaysan ugu noqon shaqaale toos ah milkiilayaasha wax soo saarka iyo amuuraha la xiriira.
- c. Waaxda Caafimaadka Xoolaha (health departement) waa inuu kormeeraa hawlaha ay qabanayaan dhakhaatiirta aan dowliga aheen
- d. Maamulka(waaxda Caafimaadka Xoolaha kaliya waxey (bixineysaa) oo kaliya kharashka shaqooinii ay fuliyey dhakhaatiirta aan dowliga aheen.
- e. Dhaqaatiirta aan dowliga aheen (The Private Veterinarian) waa inaysan lahayn dan gaar oo ka baxsan heshiskii qandaraas oo lala galay
- f. Xadgudubyada laga yaabo inay ka yimaadaan dhinaca Dhaqaatiirta Xoolaha ee aan dowliga aheen waxaa loo furayaa gal dacwadeed madani ah ama loo gudbindoona maxkamadda dambiyada .waaxda caafimaadkana waxey awoodaa in ay kala noqoto qandaraaskii isla markaana Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta Xoolaha (Veterinary Board) ay ka joojinayaa ku shaqeynsiga xirfadaas sida uu qeexaayo wadiiqada lagu sharxay xeerka sharcigan dhexdiisa;
- g. Isku dhafka xirfadeysan oo ay leeyihiin dhaqaatiirta xoolaha gaarka ah (private veterinarian) oo fulinaaya shaqooyin gaar ah, waa in aysan ka horimaan shuruucda waaxda caafimaadka iyo mid Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha (National Veterinary Board).

Qod 9.2.

Daaweynta Xoolaha oo ay Fuliyaan Dadka aan ahayn Dhakhaatiirta Xoolaha

Qod. 9.2.1.

Awoodda Maamul ee Goob Adeeg Caafimaad ee Mucayin ah waxaa ka mid ah:

1. Maamulka Dhaqaatiirta xoolaha waa inay hubiyaan adeegga dhaqaatarnimo ee ka imaanaaya dadka aan dhaqaatiir ahayn ee loo sharciyey, loona xilsaaray, oo la siiyay hab-dhismeedka hawlaha latalin farsamo, caawin, iyo kormeer/hagid taasoo oo siiyey dhaqtarka qaliinka xoolaha, isla markaasna inuu hubiyo xoolo- dhaqatada ay heli karaan dadkaas markasta oo ay ubaahdaan. Ku kormeerid Si looga hortago si xun u isticmaalidda daawada (missuse of drugs) iyo hortaga khatarta ku imaanayasa caafimaaadka guud iyo yareeyo khatarta caafimaadka ganacsiga xoolaha ee caalamiga ah.
2. Awoodda hay'adda Caafimaadka xoolaha ee loo xilsaaray deegaan oo ay u xilsaartay Maamulka Dhaqaatiirta xoolaha waa in ay gebi ahaanba xakameeyaan oo hagaan dhamaan arrimaha daaweynta xoolaha iyo daryeelokooda ee deegaankaas loo xilsaaray. Dhaqaatiirta aan dawlaga ahayn iyo kuwa aan dhaqaatiir xoolo ahayn ee aaggaas waana inay wada shaqeyn la yeeshaan Dhaqaatiirta wasaaradda xoolaha, dhamaanba arrimaha la xiriira daaweynta xoolaha ee aaggaas.

Qod. 9.2.2.

Adeegga Daryeellaha Caafimaadka Xoolo ee ku Salaysan goob caafimaad (CBAHWs)(CAHWs)community animal health workers

1. Meesha uusan joogin dhakhtar ama kaaliye dhakhtar waxaa hawshooda qabanaya caawiye kaaliye(CAHWs) oo uu kormeerayo kaaliye caafimaada ama dhakhtar sharciyeesan kana diiwaan gashan Guddiga qaranka.

2. Xulashada, tababarida, shahaado siin, diiwaangelinta, kormeerka iyo indha-indheynta iyo ilaalinta habsami u socodka hawlaha uu qabanaayo Daryeellaha Caafimaadka Xoolaha-CAHWs waxaa cadeynaya sharcigaan ayada oo latashi lala sameynaayo Guddiga Qaranka

Cutubka 10aad.

Qaanuunka Daawooyinka Xoolaha iyo Wayaabaha La xiriira

Qod.10.1.

Iibsashada iyo Qeybinta Daawooyinka Xoolaha

1. Wasaaradda xannaanada xoolaha waa inay xakameysaa awoodda soo dejinta ama keenista dalka daawooyinka xoolaha
2. Daawooyinka dalka loo soo dhoofinaayo waa in ay yihiin kuwo lagama maarmaan ah soo gelintooda dalka oo ay ogolaatay Wasaaradda
3. Waaxda Caafimaadka xoolaha oo wada shaqeyn la leh Guddiga Sare ee Qaranka Xoolaha (National Veterinary Board) waa inay diyaariyaan liis ay ku qoran yihiin magacyada daawooyinka muhiimka ah iyo wax yaabaha kale ee la xiriira;
4. Waaxda Caafimaadka xoolaha waa inay abuuraan hannaan gaar ah ayna soo saarto shuruuc qeexaya waxyaabaha la soo dhoofinaayo, la keenayo ama la soo gelinaayo dalka, iyo habka gacan ku hayntooda iyo sidoo kale adeegsi tallaalka iyo wixii kale oo la xiriira waxa ka soo baxa noolaha (biological products).

Qod. 10.2.

Xeerarka soo dejintayayaasha, Qeybintayayaasha iyo iibiyaasha Dawooyinka Xoolaha

1. Qofna looma ogola inuu gudaha dalka soo geliyo ama u soo dhoofiyo, uu ku qeybiyo ama uu ku iibiyo marka laga reebo dadka hoos ku xusan ilaa isaga ama iyada ay ahaanayaan:
 - a. Dhaqtarka xoolaha oo la diiwaan geliyay;
 - b. Farmashiiste la diiwaan geliyay;
 - c. Farsamoyaqaan xero-xoolo oo la diiwaan geliyay ama caawiyaha caafimaadka xoolaha oo uu kor ka eegaayo dhakhtarka caafimaadka xoolaha oo la diiwaan geliyay;
 - d. Ganacsadaha xoolaha oo leh shaqo hoostagta dhaqtarka xoolaha daaweeya ama farmashiste la diiwaan geliyay. Awooda isticmaalka, dalabaadka, keydinta iyo qeybinta ee daawooyinka xoolaha waxaa leh farmshistaha
2. Qof kasta oo doonaaya in la diiwaan geliyo si loogu ansixiyo soo dhoofinta daawooyinka xoolaha waa in:
 - a. uu leeyahay shatiga wax soo dejinta oo dhaqan gal ah oo ay bixisay Wasaaradda Ganacsiga;
 - b. uu leeyahay meel ku haboon oo buuxinaya shuruudaha lagu keydiyo daawooyinka xoolaha;
 - c. uu ahaadaa mid lagu diiwaan geliyay sida uu qabo sharcigaa iyo midka Golaha Qaranka X/Xoolaha iyo
 - d. In uu buuxiyaa shuruudaha qodobka 56 ee kor ku xusan.

Qod. 10.2.1.

Fududeynta iyo Shuruudaha Keydinta Daawooyinka Xoolaha

1. Ka-ganacsiga, keydinta, qeybinta iyo tafaariiq ku gadidda daawooyinka waa in ay raacaan qabka diiwaan galinta uu qabo sharcigaan;
2. Gobta keydinta waa in ay ahaataa mid nadiif ka ah dooliga iyo cayayaanka;
3. si loo ilaliyo tayada daawooyinka Gobtaas waa in ay lahaataa hawo ku filan(ventitation) iyo keydinta iyo iibinta daawooyinka
4. Daawada muddan waa in lagu keydiyaa firintijeer(qaboojiye) ama si ay buuxiyaan shruuda keydinta
5. Si ay u fududaato barista dawooyinka la soo gada iyo kuwa la iibiyo waa in Diiwaanka keydinta iyo tirada alaabta la hayo mark hore la diyaariyaa
6. Daawooyinka dhacay waa in dhaqso lays kaga gubaa ama lagu duugaa dhulka hoostiisa iyada oo la raacayo soo jeedinta dhaqtarka daaweynta xoolaha ee ay arrintaas quseyso.

Qod. 10.2.2.

Shuruudaha soo dejinta iyo Qeybinta:

1. Wasaaradda X, Xoolaha, ayada oo la tashaneysa Golaha Guddiga Dhaqaatiirta Qaranka ee X/Xoolaha, waa in ay kula talisaan Wasaaradda Ganacsiga inay bixiso shatiga soo dejinta, ogolaansha soo dhoofinta daawooyinka xoolaha ama wixii kale ee la xiriira oo loogu talo-galay qofka lagu diiwaan geliyay sharcigan;
2. Qofka doonay in uu soo dejinta daawooyinka xoolaha waa in uu buuxiyaa shaxadda codsiga keenida daawada adiga oo caddeynaya godobada soo sida:
 - a. sababta daawada u soo dejinaayo
 - b. Shirkadda lagu soo sameeyey iyo nooca daawada la soo galinaayo
 - c. Daawadaas waa in ay ka haysataa wadankii soo saaray ogolaasho gadis free sale certificate

Qod. 10.2.3.

Diiwaangelinta Ganacsatada iyo Dhismo Ganacsi oo ay Leeyihiin Dhaqaatiirta Daawooyinka Xoolaha

1. Diiwaangeliyaha ee Guddiga Caafimaadka Xoolaha waa in uu ku keydiyaa diiwaan gaar ah oo uu ku haynaayo kana muuqdaan magacyada loo ogolaadayaasha inay wax soo dejiyaan, qeybiyaan, ama daawooyin ku iibiyaan dalka, iyo magaca iyo cinwaanka dhismahooda ganacsiga. Habka diiwaangelinta waa in uu ahaadaa tubta uu tilmaamaayo isla markaana hoos tagaaya sharcigana la sameeyay. Diiwaangelin kasta waa in la sanadkiiba mar la canshuuraa.
2. Soo-dejiyaha la diiwaangelinaayo waa inuusan sii wadanin soo dejinta daawooyinka xoolaha inta lagu jiro diiwaangelinta kala guurka ah, isaga/iyada magaciisa ma magaceeda waa in laga saaraa liiska diiwaangelinta. hadduu san canshuuran sanadka, mana keeni karo wax kasto uu ku sabsan shatigaasi.
3. Diiwaangeliyaha waa in uu ka tiraa diiwaanka magaca qofka horay loo diiwaan geliyay isla markaana geeriyooday ama qof kasto oo ay waaxda caafimaadka iyo Guddiga Dhaqaatiirta xoolaha (the Veterinary Board) ay ka tiraan liiska sababo jira awgeed.

4. Diiwaangeliyaha sababo jira awgood wuxuu diidi karaa in uu diiwaan galiyo ama uu ka tiriro diiwaanka asaga oo raacaya talada waaxda caafimaadka ayaga oo latashi la sameeyey Guddiga Qarqanka oo u araka in aysan ku habooneyn sii wadashada gadista daawada.
5. Qof diiwaan gashan ma qeybin karo ama ma iibin karo daawooyin iyo waxyaabaha la xiriira ilaa la koontaroolo goobta uu ku ganacsanaayo

Qod. 10.2.4.

Shuruudaha iibinta Daawooyinka Xoolaha ee Jumlo iyo Tafaariiq

1. Iibka daawada tafaariiq iyo jimlo waa in ay weheliyaan calaamada ku dheggan oo muujinaysa:
 - a. Magaca ganacsiga, magac guud iyo waxa ay ka kooban tahay
 - b. Taxaddirka loo qaadanaayo oo daawada ku xusan;
 - c. Inta la qaadanayo iyo meesha laga qaadanayo
 - d. Taariikhda la soo saaray;
 - e. Taariikhda ay dhaceyso;
 - f. Aqoonsi lamberka; iyo
 - g. habka keydinteeda.
2. Haddi ay ka maqan yihii macluumaadka kor ku xusan waa in lasoo raaciyaa lifaaq warqad caddeyneysa macluumaadkaas
3. Iibiyaha daawada waa in uu haystaa buuga oo uu ku cad macluumaadka daawada si ay u sahalanaato kormeerka logana fagaado in la soo dejiyo daawooyin aan ku habboonayn dalka.
4. Qof kasta oo sharci darro ku sameeya leebal ama calaamad been abuur ah adeegsada ama baako ama konteenar ama wax soo saar kale oo lagu xusay sharcigan oo ay ku caddaato, wuxuu mutaysanayaa ciqaab dambiyadeed.
5. Qof kasta oo si ogaal ah u iibiya daawo cillad leh, daawo dhacday, daawo la barxay ama been abuur ah oo ay ku caddaato wuxuu mutaysanayaa ciqaab dambiyadeed.

Qod. 10.3.

Isticmaalka Sharciga waafaqsan Daawooyinka Xoolaha

Qod. 10.3.1. Qasadka Isticmaalka

Daawooyinka xoolaha waa in loo isticmaalaa oo kaliya ujeeddo:

- a. Daaweyn iyo ka hortagga cudurrada xoolaha iyo shillinta.
- b. baarista Ogaanshaha cudurrada xoolaha.
- c. Ka ilaalinta goryaanka iyo duqsiga gendiga.

Qod. 10.3.2.

Shaqsiiyaadka loo Ogolaaday inay Isticmaalaan Daawooyinka Xoolaha

1. Shaqsiiyaadka sharci ahaan loogu ogolaaday inay isticmaalaan daawooyinka xoolaha waa in ay ahaadaan:
 - a. Dhaqaatiirta xoolaha aan dowliga aheen oo loo ogolaaday in ay siiyaan kuna daaweeyaan xoolaha jiran.

- b. Kaaliyaha caafimaadka xoolaha gaarka oo la diiwaan geliyay oo loo ogolaaday in ay siiyaan kuna daaweeyaan xoolaha jiran , ayada oo indha ku haynaayo ama la soconaayo dhaqtarka xoolaha oo la diiwaan galiyay.
 - c. Saraakiisha Dawladda oo dhaqaatiir xoolo ah, ayaga oo raacaaya sharciga waxey awoodaan maamulka daawooyinka sida qeybinta iyo ku daaweynta meel kasta oo ay joogaan.
 - d. Saraakiisha Dawladda oo ah Kaaliyaasha caafimaadka xoolaha ayaga oo raacaaya sharciga waxey awoodaan maamulka daawooyinka sida qeybinta iyo ku daaweynta meel kasta oo ay joogaan ayada oo indha ku haynaayo ama la soconaayo dhaqtarka xoolaha .
2. **Xumaan la'aanta tuduca (1)** ee kor ku xusan, Golaha Qaranka ee daaweynta Xoolaha waa in ay u raacaan sharciga heerarkiisa kala duwan ee daawooyinka xoolaha kaasoo loogu talo-galay xero xayawaaneedyada ama Kaaliyaha caafimaadka xoolaha ee wax qeybiya, jideyn ama maamulaha xoolaha tusaalaynta oo ka imaanaysa dhaqtarka xoolaha.

Qod. 10.4.

Awooda mamnuucidda Isticmaalka Tallaalka iyo Daawooyinka

Wasaaraddu waxaa ay mamnuuci kartaa isticmaalka tallaalka & Daawooyinka aan ku habooneyn in lagu isticmaallo xoolaha ee Dalka gudihisa.

Cutubka 11aad.

Khidmadaha, Ganaaxyada iyo Qodob kale

Qod. 11.1.

Nidaamka Khidmadaha(Lacagaha)

Qod. 11.1.1.

Khidmadda Adeegga iyo Lacagata la qaadayo (fiiga ah)

Waxda Caafimaadka Xoolaha waxa ay si waafaqsan sharcigan iyo xeerhoosyada lagu dhaqan-galinayo u soo saari kartaa khidmad adeeg oo laga qaadayo xoolaha iyo waxyaabaha ka-soo-baxa xoolaha, taasoo laga qabanayo shaqo sida uu qabo sharcigan, waxaana kamid ah:

- a. Baarista iyo shahaado-siinta ee xoolaha oo la dhoofinayo ama la soo gelinayo dalka kuwaasoo loogu talo-galay in ay cunaan beni'aadanku ama la siinayo xoolaha amaba loo isticmaalayo Beeraha;
- b. Shaybaarrada cudurrada;
- c. Isticmaalka Xeryaha Xoolaha, Karantiinada, Kawaanada iyo wixii la mid ah;
- d. Diiwaan gelinta iyo ruqsad siinta kuwa ku shaqeysanaya mihnadooda iyo goobaha lagu haynayo xoolaha;
- e. Ogolaanshaha, diiwaan gelinta ama ruqsad siinta, iyo wixii la mid ah ee soo dejinta, qeeybinta, gadista daawooyinka xoolaha, kimikaaliska, talaalada xoolaha iyo wixii kale ee la xiriira shaqooyinka baarista iyo xakameynta waxyaabahaas;
- f. Iyo wixii kale oo khidmad ah oo uu Wasiirka Xannaanada Xoolaha oo uu ku soo saari karo xeer wafaqsanna sharcigan.

Qod. 11.2.

Joojinta, Qalista ama Tuurista Neef Jirran

Qod. 11.2.1.

Joojinta Neef Jirran ama aan Wanaagsaneeyn

Waaxda Caafimaadka Xoolaha ama Takhtar ka socda hay'addaas wuxuu awood u leeyahay in uu diido in la dhoofiyo neef kasta oo uu u arko in aanu caafimaad qabin ama ku habooneeyn in uu galo safar ama xaaladiisu ay liidato kuna wanaagsaneeyn in la dhoofiyo, kaasoo dib ugu celin kara neefkaas ama xoolahaas karantiinkii ay markii hore ka yimaadeen.

Qod. 11.2.2.

Mas'uuliyadda Milkiilaha ee Wixii Dhuma Ama ka Halaab Xoolaha iyo Oonta Xoolaha ee Lagu haayo Baaritaan

Xoolo ama oonta xoolaha ee iyagoo is qaba loogu geeyo baaris, sarkaalka baarista xoolaha wixii ka halaaba, dhinta ama la tuuro waxaa iska leh milkiilaha loomana hayasto baaraha haddi aanu sameeynin ama ku kicin mas'uuliyad-darro cad oo dhaliyey in waxyaabahaasi ama neefkaasi uu u dhinto ama ka xumaado.

Qod. 11.2.3.

Qalista Neef Xanuunsan

Waaxda Caafimaadka Xoolaha ama Hay'adda kaloo Xoolaha ee u xilsaaran arrimahaas waxa ay amri kartaa in la qalo neef kasta oo jirran ama looga shakisanyahay in uu qabo cudurrada la is qaadsiyo sida ku cad sharcigan ama xeerarka hoos yimaado.

Qod. 11.3.4.

Tuurista Raqda Neef la Qalay

Waaxda Caafimaadka Xoolaha ama sarkaalka baarista ee Caadimaadka Xoolaha wuxuu amri karaa in la tuuro ama la baabi'yo raqda neef la qalay ama qayb ka mid ah raqdaas sida waafaqsan xeerkan ama xeerhoosaad kale.

Qod. 11.3.

Xayirid, la Wareegid, Karantiin ama Tuurista Neef ama oon-xoolaa

Qod. 11.3.1. Xayiraad Xoolo

1. Sarkaal Maamul, Baare-xoolaad ama sarkaal Boolis waxay xayirikaraan ogeeysiis la'aan, neef kasta oo loo arko amaba lagu sababeeynayo in uu ku sugan yahay xaaladaha uu tilmaamayo sharcigan, waxaana la geyn karaa xero ama meel kale oo uu u soo sahamiyey sarkaal ka tirsan Xannaanada Xoolaha ama baare-xoolaad kaasoo meeshaas lagu haynayo amarka maxkamadda.
2. Mar allaale iyo markii la xayiro neef laguna hayo meel cayiman sida ku qoran qodobkan (1), sarkaalka amarka bixiyey wuxuu si aan daah laheeyn warbixin ugu gudbinayaa xeer ilaaliyaha degmadaas in neefkaas ama xoolahaasi loo xayiray sababahaas awgood.

Qod. 11.3.2.

La wareegid Xoolo

1. Haddii ay Maxkamaddu ku qanacdo sababta lagu xayiray neefka jebiyay sharciga iyo qaanuunka xoolaha sida ku xussan 11.3.1 wuxuu amri karaa in milkiilaha neefkaas uu siiyo maamulka Xannaanada Xoolaha lacag u qalanta in ay daboosho kharashkii ku baxay haynta neefkaas ama neefafkaas mudadii la hayey, waana in lacagtaas lagu bixiyaa waqti ay

maxkamaddu cayintay, haddii waqtigaas lagu bixin waayana waxaa lagala wareegaayaa xoolahaas oo markii la iibiyo laga bixinayaa kharashka, wixii u soo harona la siinayo milkiilaha.

2. Haddiiba mar uu neef ama Xoolo jebiyo qaanuunka la xariira sharcigan balse aan la hayn ama aan la aqoonin milkiilaha iska leh xoolahaas, maxkamadduna markii ay hesho waxyaaba uu muujinaya in ay rumeysato in aan la aqoonin ama la haynin milkiilaha neefkaas/ xoolahaas waxeey ku xakumi kartaa in ay la wareegto dawladda.

Qod. 11.3.3.

Go'aan ka Qaadashada Neefka lala Wareegay

1. Markii lala wareego xoolo sida uu qabo sharcigani waa la qali karaa, iibin karaa haddii aanay maxkamaddu u dhigin si kale.
2. Markii xoolo ama raq xoolaad la amro in la gado, maxkamaddu waxey soo sareeysaa qaabka loo iibinayo xoolaha oo dhan ama qayb kamid ah iyo inta la siinayo milkiilaha xoolahaas ama neefkaas, haddii aanu jirin qaabkaasi jideeysan, qaab iibineedka waxaa la wareejinayaa soo uruuriyaha dakhliga dawladda.

Qod 11.3.4.

Xayirid, La-wareegid iyo Go'aan Ka qaadashada Oonta Xoolaha

Wixii la xiriira arrimahan waxaa lagu dabaqayaa Qodobada 68aad, iyo 69aad ee xeerkan.

Qod. 11.3.5.

Ka-Madax-banaanida Bixinta Magdhaw

Tallaabo lid ku ah lagama qaadi karo sarkaal ka diiwaan gashan Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta & Daaqa ahna takhtar sharciyeysan ama ka tirsan hay'adda Maamulka Xannaanada Xoolaha dambi kasta uu galo asagoo ku shaqeeynaya gudashada waajibaadkiisa shaqo wanaag ah sida uu qabo sharcigani dambiyadaas oo la xiriira baaritaan cudur, xakameyn cudur, ka hortag cudur ama daaweeyn cudur kamid ah cudurada faafa. Laguma laha wax magdhaw ah sarkaalka ka tirsan Waaxda Caafimaadka Xoolaha dambi kasta uu galay ee hoos yimaada sharcigan haddii aanu wasaaradda Xannaanada Xoolaha si kale ugu amrin.

Qod. 11.3.6.

Ka bixinta Magdhaw Ciribtirka Cudurrada Faafa

Wixii ka baxsan Qodabkan 73, Waaxda Caafimaadka Xoolaha asagoo ciribtiraya cudur kamid ah cudurrada faafa neefkii uu qalo ee qaba cudurka ama uga shaki qabo cudur waa in laga bixiyaa magdhaw. Lacagta uu ka bixinayo neef kasta oo caafimaad qabay ee la qalay waa in aysan ka badnaanin qiimaha iibka suuqa uu ka joogo markaas, sidoo kale lacagta uu ka bixinayo neefka jiranaa waa in aysan ka badnaanin nus qiimaha neefkaas uu ka joogo suuqa markaas. Jaangooynta qiimaha suuqa waxaa caddeynaya Waaxda.

Qod. 11.4.

Ganaaxyada

1. Qof kasta oo ku xad gudba qodob kamid ah qodobada sharcigani wuxuu muteeysanayaa in lagu xakumo:
 - a. Xabsi lix bilood ah ama ganaax dhan 10,000,000.00 Shilin Soomaali u dhigma 1,000.00 Doolar ama labadaba oo la isugu daro haddii aaneey maxkamadda sharciga ah si kale u go'aamin.

- b. La wareegid tallaal, dawo xoolo, xoolo, oon-xoolaad ama dhismo ama goob lagu xanaaneeyo xoolo oo lagu eedeeyey in ay dambi galeen.
 - c. Ka-tir-tirid diiwaanka, joojin ruqsad ama ogolaansho lagu bixiyey sida uu qabo sharcigani
 - d. Iyo wixii kale ee ganaaxyo ah oo uu soo saaro Wasiirku ama ay maxkamadda sharciga ah ay go'aamiso.
2. Ganaaxyada sida ka-tirtiridda diiwaanka ama joojinta ruqsad waa in lagu soo saaraa xeer hoosaad ama wareegto Wasiir ee hoos imanaya sharcigan.
 3. Wixii aan la socon Karin qeeybtan, sida fal dembiyeed dil ah waxaa lagu qaadayaa maxkamidda dambiyada ciqaabta, dembiyadaasoo khaas ahaan la xiriira ka-hor-istaagid shaqo qof gudanaya waajibaadkiisa, laaluush, ku awood sheegasho xaafiis, gudasho la'aan waajibaad shaqo, diidid ama ishartaag shaqo si sharci ah ugu waajibtay, ku dacweeyn wax aan caddeyn laheeyn, ka bixin fikir xun sarkaal xeel-dheere ah, been ka sheegid iyo been abuurid shahaadooyin iyo dokumenti dawladeed.

Cutubka 12aad.

Xaaladda Degdegta ah ee Cudurrada Xoolaha iyo Maareyntooda:

Qod.

12.1. Hay'adaha iyo Wakaaladaha:

Wasaaradda xannaannada xoolaha dhirta iyo daaqa waa hayadda hoggaamisa Barnaamijyada la Xiriira Adeegga Xoolaha, Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolahana waa inuu yeeshaa masuuliyadda guud ee lagu xakameynaayo xaaladda degdegga ee la xiriirta cudurrada xoolaha.

Qod. 12.2.

Unugga Hawlgal Xaaladda Degdegga ee Cudurrada

Wasaaradda xannaannada xoolaha, Dhirta & Daaqa waa in ay yeelataa Unugga Hawlgalka Xaaladda Degdegga ee Cudurrada heer Wasaaradeed oo uu Wasiirku magacaabay, kaddibna uu ansixiyey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliya, kana kooban:

- a. Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha kaasoo leh masuuliyadda baarista iyo ololaha ka hortagga cudurrada xoolaha kasoo sidoo kale shir-guddoomindoona Unugga (Guddiga);
- b. Madax-qaybeedyada laanta ilaalinta cudurrada xoolaha iyo unugga maamulka xog uruurinta, ilaalinta cudurrada iyo diyaarinta gurmada degdegta ah. Shaqooyinka rugta baarista caafimaadka xoolaha (Laboratory) iyo tayo ilaalinta, Dhaqaatiirta Daaweynta Xoolaha ee Gaarka ah, Baaritaanka Dhaqaatiirta Caafimaadka Xoolaha iyo Caddeymaha Dhoofka Xoolaha ee dhaqaatiirta caafimaadka guud ee xoolaha iyo shahaadooyinka caafimaadka xoolaha;
- c. Kormeere Goboleedka Caafimaadka Xoolaha;
- d. Dhaqaatiirta caafimaadka Xoolaha gaarka ah oo ay magacaabeen ururada xirfadaha gaarka ah u leh; iyo
- e. Shirguddoonka ay leeyihiin Guddiga Dhaqaatiirta iyo Daaweynta Xoolaha.

Qod. 12.3.

Guddiga Qaranka ee Gurmada Degdegga ah ee Caafimaadka Xoolaha

1. Waxaa shaqey doona Guddiga Qaranka ee Gurmada degdegga ah ee Caafimaadka Xoolaha, kaasoo xubnihiisa ay soo magacaabi doonaan wasaaradaha u xilsaran kaddibna uu ansixiyo Madaweynaha. Xubnaha guddiga waxay ka koobnaan doonaan wakiillo ka kala socda Xoogagga Wasaaradaha u xilsaaran hawlaha gurmada degdegga ah ee ka hortagga cudurrada xoolaha, kuwaasoo ahaanaaya aqoonyahanno farsamo ee gudidga iyo min hal qof oo ka imaanaaya dhan kasta sida:
 - a. Xafiiska Madaweynaha/xafiiska golaha wasiirrada (oo loogu talo-galay xiriirin heer sare oo siyaasadeed ah “high level political coordination”);
 - b. Wasaaradda Caafimaadka xoolaha (ka hortagga cidurrada “Zoonoses Control”);
 - c. Wasaaradda maaliyadda (xiriirin dhaqaale “financial coordination”);
 - d. Wasaaradda arrimaha gudaha (dhaqso uga jawaabidda hawlaha maamullada deegaanka/dawladaha hoose iyo xoogagga booliiska “prompt engagement of local authorities/municipalities and the police forces”);
 - e. Wasaaradda xiriirka caalamiga ah (si ay isugu duba riddo kaalmo caalami ah “soliciting international assistance”);
 - f. Wasaaradda qorsheynta (si loo helo taageerada saadka “logistical support”);
 - g. Wasaaradda difaaca (si loo helo taageerada hawlgalka aagga “field operation support”); iyo
 - h. Jaamacadaha iyo hoggaamiyashaasha bulshada.
2. Guddiga waa in uu warbixinta siiyaa Wasiirka isagana warbixinta u sii gudbin doona Madaxweynaha.

Qod. 12.4.

Waxqabadka Wasaaradaha Gurmada Degdegga ah ee Cudurrada Xoolaha

Wasaaradaha Gurmada Degdegga ah ee ka Hortagga Cudurrada Xoolaha waa in ay:

- a. In ay diyaariyaan liiska dib u eegidda cudurrada xoolaha kaasoo looga baahan yahay tallaabo degdeg ah iyo xeeladaha horumarineed iyo qorsho hawleed loogu talagay gurmada loo galaayo xaaladda cudurrada xoolaha;
- b. In ay diyaariyaan keydinna liis waqti waliba la socdo hay'adaha (ha ahadaan kuwa dawliga iyo bulshada rayidka ah intaba), kuwaasoo leh tashiilad looga baahan yahay barnaamijka gurmada xoolaha loo sameynaayo;
- c. In ay sameeyaan heshiisyo lagu horomarinaayo habka ka qeyb-qaadashada hay'adaha iyo wakaaladaha ku lugta leh hawlaha;
- d. In ay diyaariyaan qaanuunno lagu hagaajinaayo khatarta sare ee ka imaan karta sida tallaalka wax soosaarka cilmiga xoolaha, goobaha gowraca, hilibka iyo warshadaha diyaariya caanaha iyo subagga iyo suuqa xoolaha;
- e. Siwadidda furaha xogta macluumaadka xoolaha iyo tirada duurjoogta;
- f. Siwadid casriyeysan oo waqtiga la socota leh sharraxaad lama huraan ah sida u qoondaynta xoolaha, dhaqdhaqaaqa habka dhigaalka xoolaha rugaha waraabka iyo dhulka lagu haayo; iyo
- g. Fulinta qorsho hawleedka ee heer qaran, heer gobol iyo heer degmo iyo in la hubiyo xiriirkooda tooska ah iyo midka dadban.

Qod. 12.5.

Masuuliyadda Guddiga Qaranka Gurmada Degdegga ah ee Cudurrada Xoolaha

Guddiga Qaranka Gurmada Degdegga ah ee Cudurrada Xoolaha waa in uu:

- a. Lataliyaa Dawladda habka fulinta ee go'aannada ay gaareen Xoogagga Guddiga Gurmada Degdegga ah ee ka Hortagga Cudurrada Xoolaha;
- b. Dib-u-eegaa sharciyada jira, xeerarka iyo hadafka siyaasadaha si loo hubiyo barnaamijka gurmada degdegga ah ee loo sameynaayo ilaalinta xoolaha qaranka si loo awoodo in si xowli leh loo hawl galo xitaa haddii oo lagu jiro duruufo;
- c. Horumariyaa hannaan laysugu keenaayo, lagu faafinaayo iyo baaritaano lagu sameynaayo xogta laamaha caafimaadka xoolaha si loo ilaaliyo barnaamijka degdegga ah ee cudurrada xoolaha;
- d. Hubiyaan dhaqaalaha, xoogga aadanaha, unugyada xoojinta, caawinaad caalamiga ah; iyo ilaha kale ee mahuraanka ah inta lagu guda jiro ka jawaabidda gurmada degdegga ah ee qaranka oo ay shaaciyeen maamulka awoodda u leh ee xannaanada xoolaha;
- e. In ay hubiyaan dhammaan baahiyada la soo sheegay iyo kuwa ay khuseyso oo ku lugta leh gurmada degdegga ah ee qaranka oo ay shaaciyeen maamulka awaadda u leh ee xannaanada xoolaha.

Qod. 12.6.

Doorka uu leeyahay Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha (CVO) Inta Lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ee Cudurrada

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha waa:

- a. In uu si joogta ah uga shaqeeyo xaaladda ka jawaabidda gurmada degdegga ah ee cudurrada;
- b. In uu kala taliyaa Dawladda habka abaabulka iyo habdhismeedka saxda ah ee Xoogagga Shaqada Wasaaradaha ku shaqada leh gurmada xaaladda deg degga ah iyo Gudiga Qaranka ee cudurrada xaaladda deg degga ah;
- c. In uu kala taliyaa Dawladda wax ka badalka sharciga, siyaasadaha iyo amarrada ay bixinayaan Xoogagga Shaqada Wasaaradaha ku shaqada leh gurmada xaaladda deg degga ah iyo Gudiga Qaranka ee cudurrada xaaladda deg degga ah iyo dib uraacidda waxyaabaha mudnaanta leh ee wadidda hawlahooda iyo waxyaabaha kale ee ku habboon;
- d. Latalinta Gudiga Qaranka ee cudurrada xaaladda degdegga ah ee barnaamijka qaranka ee cudurrada xaaladda degdegga ah iyo qorsho hawleedyada; iyo
- e. La-talinta Gudiga Qaranka ee cudurrada xoolaha ee xaaladda degdegga dhinaca dhaqaalaha iyo ilaha kale ee khayraadka leh, oo loo baahan yahay in si dhaqsi ah loo joogteeyo tallaabada xoogga shaqada ee xaaladda degdegga ah ee cudurrada xoolaha si loo xaqsiyo ilaha gaarka loo leeyahay ee dhaqaalaha ee la adeegsado iyo faqiriinta ay baa biyeen xaaladda dhaqdhaqaaqa ee hawl galka ilaalinta cudurrada xoolaha.

Qod. 12.7.

Waajibaadka ay Leeyihiin daneeyaasha xoolaha (livestock stakeholders) inta lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ah

1. Dhamaan shaqaalaha caafimaadka xoolaha oo ay ku jiraan dhaqaatiirta qalliinka Xoolaha, Farsama-yaqaannada xero xoolaadyada, Kaaliyeyaasha caafimaadka xoolaha, farsamo

yaqaannada xarumaha barista xoolaha (Laboratory), kuwa hilibka barista ku sameeya, tallaalyaasha xoolaha iyo kalkaaliyaasha shahaadooyinka haysta iyo caawiyayaasha kale ee shaqaalaha oo ay ku jiraan dadweynaha deggan meelaha shaqaalaha caafimaadka xoolaha ka hawl-gala aaggaas, waana in ay oofiyaan oo fuliyaan dhaqdhaqaaqa ka qeyb qaadashada tallaabada xoogga shaqada ee gurmada degdegga ee ka hortagga cudurrada xoolaha mar allale markay codsadaan maamulka xoogaga ay quseyso.

2. Dhamaan hay'adaha xannaanada xoolaha kuwa dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahayba, oo ay ku jiraan soodejiyashaasha/qeybiyayaasha oo ay leeyihiin farmashiiyayaasha dhaqaatiirta xoolaha iyo soo saaridda Waxaha Biyoolojiyada & Daawooyinka xoolaha (Biological Products), ganacsatada xoolaha diyaariyayaasha ama hagaajiyayaasha hilibka xoolaha, dhoofiyayaasha iyo wakaaladaha gaadiidka dhulka/badda/cirka waa in ay ahaadaan kuwo loo liisgareeyay barnaamijka gurmada degdegga ah ee cudurrada xoolaha iyo taageeradooda iyo ka qeybqaadashadooda wax ku ool ah waa in loo raadiyaa toosinnada oo ay leeyihiin Guddiga Qaranka ee xaaladda degdegga ah ee caafimaadka xoolaha iyo dariiqa la raacaayo.

Cutubka 13aad.

Tallaabada inta lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ah

Qod. 13.1.

Tallaabada Degdegga ah ee Maamulka Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha:

Dhacdata dhexdeeda ee xaaladda degdegga ah ee khatarta leh ee cudurrada ama joogidda cudurka ee gudana waddamada aan deriska nahay, Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha waa in uu:

- a. Dawladdaha deriska ah waa in ay ka feejignaadaan khatarta ayna xoojisaa ilaalinta qaabka caalamiga ah meelaha cudurka ka soo gali karo inta u dhexeysa xudduudiyada, iyo in la hubiyo heerka nadaafadda xero-xoolaadka iyo xoojintooda;
- b. Joogtaynta shir kulameedyada ee ay leeyihiin Guddiga Qaranka oo ah Guddiga Gurmada degdegga ah ee cudurrada xoolaha si loo diyaariyo xeeladaha guud si looga hortago khatarta taagan;
- c. In la xoojiyo barnaamijyo wacyi gelin ah oo loogu talagalay hay'adaha waxbarashada iyo si loo suurta geliyo habka ilaalinta cudurrada; iyo
- d. Dib-u-hubin waxyaabaha loo baahan yahay ee qalabka iyo kale ee ilaha muuqda oo loogu baahan yahay ka-jawaabidda xaaladda degdegga ah.

Qod. 13.2.

Tallaabo Qaadidda Markii Laga Shakiyo in uu Jiro Cudur Khatar ah:

Mudnaanta koowaad waxaa leh in la helaa baaritaan shaybaar sax ah ee lagu ogaanayo cudurka iyo qaadis tallaabooyin si looga hortago ku faafidda cudurka goobta looga shaki qabo.

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha (CVO) waa in uu:

- a. Magacaabaa xeeldheerayaal unug baaris ah si loo ogaado cudurka iyo loo uruuriyo samballada barista;

- b. Hadii ay adkaato waxa waaya aragnima loo lahaa, iyo sameyn la'aan dib udhac ku yimaada wixii la sameyn lahaa aqoondarro darteed, waxaa la raadinayaa caawinaad caalami ah si loo bixiyo oo loo helo baaritaano xeeldheereyaal shihseeeye;
- c. In daboolka laga qaado lana fuliyo karantiinka xoolaha meeshaasoo looga shakiyay inuu cudur ka jira, iyo baahintiisa wax kasta oo gundhig o noqon kara ilaanita cudurka oo loo arkay inay tahay lama huraan;
- d. In la hubiyo sheybaarrada xarumaha baarinta (laboratory) oo laga helaayo ugu yaraan daahid ee dhaqaatiirta qaranka barista xoolaha ee sheybaarrada ama caawinaadyo dhanka shirarka caalamiga ah ee sheybaarrada; iyo
- e. In loo diro talooyin Gogol-xaar ah xafiiska rasmiga ah ee caalamiga ah ee qaabilsan cudurrada xoolaha ee jiritaanka cudurka Epezootic dalka gudhiisa.

Qod. 13.3.

Tallaabo Qaadista Marka uu jiro Cudur Khatar ah oo la Xaqiijiyay

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha waa in uu:

- a. Soo nooleeyo qorshihii xaaladda khatarta xoolaha ee degdegga ah ee qaranka iyo aasaasidda xoogagga shaqada ku leh arrimahaas;
- b. Waa in uu daboolka ka qaadaa dalka inuu galay xaalad dawladeed degdeg ah ee cudurrada xoolaha;
- c. In uu baahiyo barnaamijka xaaladda degdegga, ilaalinta cudurka marka loo eego qorshaha hawlgal ee laysku raacay, ama wax ka-badelid markii ay lama huraan noqoto;
- d. In uu si dhaqsa leh u baahiyo cudurka taariikhdiisa, rugaha caafimaadka iyo ilaalada sheybaarrada si loo go'aamiyo meelaha juquraafi ahaan wax ka dheceen iyo koritaanka cudurka ee si joogta ah u kordhaya;
- e. La mamnuuco ama xoolaha laga shakiyay laga joojiyo dhaqdhaqaaqa iyo waxa ka-soo-baxa xoolaha intaba si aanu u faafin cudurka oo loo go'aamiyay in laga ilaaliyo ku faafitaankiisa aagga kale oo ay ku areeraysanyihiin xoolo meesha ay wax ka dheceen sida ugu dhaqsaha badan ilaa baaritaanno lagu sameynaayo lana arkaayo suurta galmimada lagu yareyn karo cabirka cudurka ilaa xaaladda ay soo hagaagto;
- f. In loo diro warbixinno sugan oo tilmaamaaya horumarka la gaaray Xafiis goboleedyka caalamiga ah ee cudurrada xoolaha (Epizooties) iyo Hay'adaha heer gobol iyo heer caalami sida: (OIE, WHO, FAO); iyo
- g. U horseedid horumarka laga gaaray barnaamijka ilaalinta xaaladda degdegga ah iyo talada Guddiga Qaranka ee Xaaladda Degdegga ah ee Xoolaha wax kasta oo isbedel ah ee loo baahan yahay ilaalinta arrimaha xeeladeysan ee ka hortagga cudurka.

Qod. 13.4.

Tallaabada ku Aaddan Dhammaadka Barnaamijka Xaaladda Deg degga

Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha waa in uu:

- a. Degdeg u ilaaliyaa cudurrada si loo hubiyo faafidda Jeermiska cudurka jira lana baabi'yo lana tirtiro. Ilaalinta cudurka waa la sii wadiyaa waqti dheer haddii ay lama huraan noqoto, kadib markii barnaamijka la ilaaliyo hoos u dhigiddiisa;
- b. Diyaarinta iyo qeexidda, caddeeynta lana muujiyo in dalku xor ka yahay mar kale cudurkaas; iyo

- c. Gacan ka gaysashada qorshaha iyo caawinidda waddamada kale ee nadiifka ka ah cudurka.

Cutubka 14-aad.

Guddiga Qaranka ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha (National Veterinary Board)

Qod. 14.1.

Dhisidda Guddiga Qaranka ee X/Xoolaha

Qod. 14.1.1.

Xubnaha Guddiga Qaranka ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha

1. Madaxweynaha Soomaaliya waxa uu magacaabayaa Guddiga Sare ee Qaranka ee Dhaqaatiirta Xoolaha kadib markuu dhagaysto talo soo jeedinta Wasiirka;
2. Guddiga Qaranka ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha wuxuu ka koobnaanayaa (7) xubnood oo isugu jira kuwa soo socota:
 - a. Hal dhaqtar oo qaabilsan qaliinka xoolaha oo ay soo doorteed Shirweynaha Ururka Xirfadlayaasha ee takhaatiirta qalliinka ee diiwaangashan iyo farsamoyaqaannada beer-xoolaadka, oo noqonaaya Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta Xoolaha;
 - b. Agaasimaha Waaxda caafimaadka Xoolaha oo noqonaaya diiwaan-geliyaha Guddiga Qaranka Dhaqaatiirta X/Xoolaha;
 - c. Labo farsamoyaqanno oo ka hawlgala Xarumo Xoolaad , oo ka socda Waaxda Caafimaadka Xoolaha & Waaxda Horumarinta Xoolaha;
 - d. Hal Dhaqtarka oo qaabilsan Qaliinka Xoolaha oo la diiwaan geliyay iyo hal farsamoyaqaan beer-xoolaad, kuwaas ay u diyaarsan tahay ganacsiga daawooyinka xoolaha ama waaya aragnimo buuxda u leh haynta/baarista, oo labadaba ay soo xuleen Guddiga Xirfadlayaasha Xannaanada Xoolaha; iyo
 - e. Hal xubin sharafeed ee uu soo magacaabay soona xulay Wasiirka, kaas oo noqonaaya xubin xafiiseed waan in uu ahaada saraakiishii hore oo waayo arag ah

Qod. 14.1.2.

Qaab-Dhismeedka Xafiiska Guddiga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xoolaha

Xubnaha Guddiga Qaranka **Dhakhaatiirta X/ Xoolaha** wuxuu ka koobnaadoona sidaa :

- a. Guddoomiyaha Guddiga
- b. Agaasimaha Waaxda caafimaadka Xoolaha isla markaan ah Diiwaan-geliyaha Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha; iyo
- c. Xoghayn uu iska dhex magacaabay Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta Xoolaha kana hoos shaqeynaya Guddoomiyaha Guddiga, asaga oo ka wakiil ahna masuulna ka ah dhamaan arrimaha maamulka ee Guddiga.

Qod. 14.1.3.

Muddada Xilka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha

1. Xubnaha Guddiga waxay xafiiska haynayaan saddex sanadood, laakiin waxay ahaan karaan kuwo la soo dooran karo oo dib loo soo magacaabi karo.

2. Xubin kasta oo ka mid ah Guddiga, oo aan ahayn xubintii sharafeedkii lagu soo xulay in uu ahaa sargaal hore, waa iska casili karaa xilka xafiiskiisa isagoo qoraal u soo qoraaya Wasiirka, laga bilaabo taariikhda Wasiirka laga helo ka bixidda xubinnimada waxaa istaagaaya xubinnimadii Guddiga.
3. Madaxweynaha oo dhagaysanaaya talo soo jeedinta Wasiirka, oo ay weheliso tusaaleynta Agaasimaha Guud iyo Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha oo tilmaamay Dhaqtarka Qalliinka Xoolaha ama farsamoyaqaan xero-xoolaad la diiwaan geliyay si uu u fuliyo si ku-meelgaar ah uuna beddelo haddii uu dhinto xubin ka mid ah Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha, is casilaadda , ama ka maqnaashaha Soomaaliya ama xil gudasho la'aan ku timid.
4. Xil-xafiiseedka ee Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha waa inay fuliyaan waajibaadkan sida ku cad shaqadooda ama ay raacaan oo fuliyaan sida ku xusan sharcigan.

Qod. 14.1.4.

Shirarka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/ Xoolaha

1. Guddiga Qaranka **Dhakhaatiirta X/ Xoolaha** waa in uu kulmaa sida xilliyada, ay muhiimka tahay ama xilli kale oo muhiim ah oo laysku raacay oo ku saabsan hawlaha ay hayaan, waana in shirkan lagu qabtaa waqtiyada iyo maalmaha ay Guddiga go'aansadaan.
2. Shir-Guddoonka Guddiga waa in uu caddeeyaa dhammaan shirarka la qabanaayo ee Guddiga, haddii uu maqan yahay guddoomiyuhu waxaa qeexaaya xubnaha shirka iyagoo tixgeliinaayo tirada shirka soo xaadirtay oo dhan koromka waa inay doortaan shir-guddoon sii wada shirkaas.
3. Tirada kooromka Shirka ee Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta Xoolaha waa in uu ahaadaa Shan.
4. Go'aannada ka-soo-baxaaya shirarka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha waa in uu ahaadaa codeynta mid la raacaayo hadba tirada badan (Majority of Votes), (50 + 1), waana in uu Shir-Guddoonka kulanka haystaa asalka dokumentiga iyo codadka la ritay.
5. Qoddobada dooda shir kasta waa in la keydiyaa, waana in uu ogolaada shir-guddoonka si loo dardar galsho fulinta goamadaas.

Qod. 14.1.5.

Awoodaha iyo xilalka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha

Guddiga Qaranka **Dhakhaatiirta X/Xoolaha** waxaa ay leeyihiin waxqabad iyo awoodo kuwaasoo kala ah:

1. In ay hagaajiyaan tayada iyo heerka waxbarashada dhaqaatiirta Daaweynta Xoolaha heer kasta.
2. Diiwaan-gelin iyo diiwaan-gelin la'aanta ee dhaqaatiirta xoolaha, farsamo yaqaannada xero-xoolaadyada iyo caawiyayaasha caafimaadka xoolaha.
3. Shati-bixinta loogu talo-galay dhaqan-gelinta dhaqaatiirta daaweynta xoolaha ee gaarka loo leeyahay iyo diiwaan-gelinta goobta daawada xoolaha lagu qadayo sida lagu qeexay sharcigan
4. Qeexitaanka heerka looga baahan yahay arrimaha la xiriira goobta, qaabka iyo tayada shaqada dhakhtarka xoolaha uu qabanayo
5. Dajinta hannaan toosan oo lagu dhisaayo dhaqaatiirta xoolaha daaweyntooda/ururro xirfadeedyada xannaanada xoolaha, ayada oo la ansixinaayo lana cadeynaayo shuruudahooda,

lana kormeeraya hoomarkooda loona sameynaayo sharciyo lagama maarmaan u ah sii-wadidda iyo hawlgelinta kaalintooda.

6. Diyaarin iyo dib-u-eegid xaaladda sharciga xannaanada xoolaha.
7. Shaqo ka joojin haddii ay dhacdo waxyaabo sharcidarra ah iyagoo ka wakiil ah adeeg bixinta sida lagu qeexay 14.3.
8. Diyaarin sharic-hoosaad iyo qawaaniin xukumaya shaqada dhakhaatiira gaarka ah si ay kor ugu qaadaan una toosiyaan Maamulka Dhaqaatiirta Xoolaha.
9. In ay ka caawiyaan Maamulka X. Xoolaha si Wasiirku u soo saaro xeerar kala duwan iyo sharciyo barlamaan ee la xiriira arrimaha daaweynta iyo daryeelka xoolaha.
10. In laga caawiyo Wasiirka soo saaro xeerka siyaasadda xoolaha iyo wadadii loo mari lahaa
11. Iyadoo la fiirinaayo habka kala sareynta xilalka, Guddiga Sare ee Dhaqaatiirta Xoolaha waxay warbixintooda siinayaan Agaasimaga Guud.

Qod. 14.2.

Magacaabista Shir-Guddoomiyaha doorashada ee Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha

Qod. 14.2.1.

Shuruudaha Aqooneed ee laga Doonaayo qofka loo Magacaabay Shir-guddoomiyaha Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha

Shaqiga loo magacaabay Shir-guddoomiyaha Guddiga Qaranka **Dhakhaatiirta X/Xoolaha** waa:

1. In uu yahay muwaadin Soomaali ah oo haysta shahaaddo jaamacadeed oo ku saabsan Dhaqtarnimada daaweynta xoolaha ama waxsoo saarka xoolaha/farsamo- yaqaan beer-xoolaad, kaasoo ka soo qalinjebiyay jaamacad la aqoonsan yahay kana diiwaan gashan Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha.
2. In da'diisa ay u dhexeyso 30 ilaa 70 sano.
3. In uu leeyahay ugu yaraan 5 sano oo waaya-aragnimo ah oo ku saabsan xannaanada xoolaha/adeegga dhaqtarnimada xoolaha.
4. In uu leeyahay xirfad hoggaamineed, awoodna u leeyahay cilmiga maamulka iyo waaya aragnimo maamulka xannaanada xoolaha/adeegyada dhaqaatiirta xoolaha iyo mashaaricda la xiriirta.
5. In uu sumcad iyo ixtiraam ku leeyahay wadanka muujin karaa waaya aragnimada uu u leeyahay la shaqeynta ururrada caalamiga ah iyo hay'adaha.
6. In uu ku fiican yahay ku hadalka iyo qoridda luqadda Ingiriiska, haddii luqad qalaad kale uu ku darsadana waa faa'ido.

Qod. 14.2.2.

Doorashada Gudoomiyaha Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha Doorashda gudoomiyaha urur xirfadeedka Xoolaha

1. Agaasimaha waaxda caafimaadka, markii uu latashi la sameeyo Agaasimaha Guud iyo Wasiirka, wuxuu shirweyne isugu yeeraaya Guddiga Guud ee Ururka dhaqaatiirta soomaliyeed si loo doorto gudoomiyaha Guddiga Qaranka **Dhakhaatiirta X/Xoolaha**, waa in lagu baahiya qalabka warbaahinta iyo iyadoo lagu baahinaayo faafinata qadka

- electaroonikada, ogeysiisna lagu bixinaayo maalin cayiman oo la qabanaayo kulanka guud, ugu yaraan 15 maalmood ka hor taariikhda la qabanaayo.
2. Tirada shirka ku qabsoomayo waa in ay ahaadaan saddex meelood labo meel xubnaha ururka ka diiwaan gashan (membership).
 3. Doorashada waa in uu hagaan Guddi Doorasho oo ka kooban:
 - a. gudoon waxaa noqo karaya qofka ugu daweyn takhaatirta iyo xubnaha meesha fadhiyo.)
 - b. Agaasimaha waaxda caafimaadka xoolaha;
 - c. Farsamoyaqaan xero-xoolaad diiwaanka ku jira oo ka socda dhinaca aan dawliga ahayn (Private Sector) oo ay soo doorteen xubnaha guddiga.
 4. Dhaqatar kasta oo laga diiwaangeliyay ururka oo qalliinka xoolaha qaabilsan ama farsamoyaqaan xero-xoolo wuxuu isku soo sharixikaraa in uu noqdo gudoomiyaha ururka haddi uu buuxiyo shuruudaha ku qoran 14.2.1 ee qeybtaan. Foomka magacaabista waa in ay ku jirtaa waraaqo daboolan oo uu leeyahay magaca soojeediyaha iyo tartamaha waana in uu ka muuqdaa saxiyyadooda.shaxda (foom) magacaabista waa in loo keenaa xubinta Guddiga Doorashada kahor inta aysan codeynta bilaabanin.
 5. Guddiga waa in uu siiyaa dhakhtar kasta ee xoolaha iyo farsamoyaqaan xero-xoolaad warqadda doorashada ee loo diyaariyay qaab shax ah (form) sida ku xusan lifaaqa II qaabka 2/2, kaas oo ay ku qoran yihi dhamaan magacyada musharixiinta sida uu qabo baaraqaraafka 4aad
 6. Dhaqtar xoolo kasta ama farsamoyaqaan xero-xoolo oo hela warqadda codeynta oo doonaya in la keydiyo isaga ama iyada codkooda, waa in uu ku qoraa calaamadda X musharaxa uu u codeynaayo magaciisa hortiiisa asaga oo ku qoraaya magaciisa warqada qarsoon isla markaana saxiixaya warqada codeynta meesha loogu tala galay. Warqad kasta oo cod bixin ah oo aan laga heli bartilmaameedyadan la rabay, ama ay ku jiraan wax ka badan bartilmaameedyada la rabay waxaa loo qaadanayaa warqadda codkeeda xumaaday
 7. Warqadda doorashada waa in loo celiyaa shir-guddoonka Guddiga Doorashada iyadoo si shaqsi ah loogu dhiibaayo.
 8. Inta lagu jiro maalinta doorashada, Guddiga Doorashada waa in ay xisaabiyaan codadka la dhiibtay ee tartame kasta helay waana in ay ku dhawaaqaan tartamaha helay tirada ugu badan ee codadka si uu u noqdo midka si rasmi ah loo doortay laguna magacaabo gudoomiyaha Qaranka dhaqaatiira X. Xoolaha.
 9. Codbixinta waa in lagu celiyaa, haddii natiijada codadka musharixiinta ugu sareeysa ay isla ekaadaan, ka tanaasulidana qaarkood waa latixgalinaayaa. waana inla xaqiijiyaa tartamaha guuleystay
 10. Guddiga waa in uu u gudbiyaa wasiirka tartamaha sida rasmiga ah loo doortay, oo asna ka codsandoona in madaxweynaha ugu magacaabo si rasmi ah gudoomiyaha ururkaas.

Qod. 14.3.

Nidaamka Waxbarashada Xannaanada Xoolaha

1. Golahu wuxuu awood u leeyahay in uu ku qanco wax barashada ardayda qaadanaaya shahaadada jaamacadda, macahadka ama dugsi sare oo laga baranayo cilmiga xoolaha isla markaana ogaadaan heerka aqoonta looga baahanyahay markii ay soo galayaan jaamacadda, machadyada ama dugsiyada sare ee farsamada iyo heerka imtixaanaadka laga qaadayo si ay u qaataan shahaadooyinka jaamacadda, machadka ama dugsiyada sare ee farsamada una

xaqiijinaya in ay ka gudbann imtaxaanaadkaas isla markaana ay ka kororsadeen ugu yaraan aqoon xirfadeed ee la xariirta shahaadada ay qaateen.

2. Si uu u fulo qodobka kore waa in Golahu:
 - a. Ogolaado manhajka wax lagu barayo ardayda
 - b. U magacaabo markii la joogaba xilli, qof soo booqda jaamacadaha ama machadyada bixinaya duruusta la xiriirta cilmiga xoolaha isla markaana warbixin ka keena, tababarka aqooneed la baranaayo, shaqaalaha iyo qalabka wax barasho oo ay haystaan goobahaas waxbarashada.
 - c. Kadibna ay ku wargeliyaan qoraal ahaan Hormuudka Jaamacadda ama machadka wixii warbixin ah ee laga soo gudbiyey goobtooda
3. Golahu wuxuu u gudbinayaa warbixinta laga soo qoray Qeeybta jaamacadaha ama machadyada ay khuseeyso warbixinta, haddii heerka waxbarashada iyo heerka imtixaanada ay yihiin kuwo aan lagu qanci Karin, wuxuu siinayaa fursad jaamacadaha ama machadyada ay ku soo dersaan warbixintaas, kuwaasoo looga baahanyahay in ay wax ka baddalaan heerka waxbarasho iyo heerka imtixanaadka iyo weliba duruusta ay bixinayaan.

Qod 14.4.

Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Takhaatiirta iyo Kalkaaliyayaasha Caafimaadka iyo Horumarint Xoolaha.

Qod. 14.4.1.

Shakhsiyadka u-qalma in ay Codsadaan Diiwaan-Gelinta

1. Qof aan diiwaan gashanayn, sida uu qabo sharcigani, ma ku shaqeeyan karo xirfadda Dhaqtarnimada daawaynta ama Qalliinka Xoolaha.
2. Qof kasta oo haysta shahaado aqoonta ama xirfad farsamo ee aqoonta xoolaha waxa uu xaq u leeyahay inuu codsado in la diiwaan-geliyo, sida uu qabo Sharcigan, wuxuu codsi diiwaan-gelin u qoran karaa Diiwaangeliyaha Guddiga.
3. Qofka codsanaya in lagu diiwaan gelin takhtarka caafimaadka xoolaha, horumarinta xoolaha ama kaaliyaha caafimaadka xoolaha waa in:
 - a. Soomaali yahay oo haysta shahaada caafimaadka xoolaha kana soo baxay jaamacad ama machad la aqoonsanyahay uuna horay u ogolaaday Golahu.
 - b. Soomaali yahay haystana shahaado machad kana soo baxay dugsiga cilmiga xoolaha, farsamada shaybaarka ama barista hilibka oo uu aqoonsanyahay Golahu
 - c. Kuwa aan soomali ahayn oo haysta xirfadaha kor ku xusan oo uu aqoonsanyahay ama ogolaaday Golahu, waa la diiwaan galinkaraa haddii uu wasaaradda ka haysto ogolaasho inuu ka shaqeeyo dalka isla markaana uu buuxiyo shuruudaha joogitaaka dalka.

Qod. 14.4.2.

Codsiga Diiwaan-gelinta

1. Qof kasta oo xaq u leh in la diiwaangeliyo sida ku cad Qodobka 14.1.2 ee kor ku qoran iyada codsigeeda/ codsigiisa, waxaa loo soo qorayaa sida ku qeexan foomka codsiga 3/1 ee lifaqa 3-ad.
2. Foomka codsiga waa in ay la socdaan:
 - a. Lacagta khidmadda ee lagu caddeeyey sharcigan laguna soo saaray wareegto Wasiir asagoo raacaya talooyinka Guddiga Qaranka ee X/ Xoolaha.

- b. Shahaadada asliga ah ee uu soo qaatay taasoo codsaduhu ku caddeyneeyo aqoonta lagu diiwangelinayo.
 - c. Haddii uu u baahdo Golahu, wuxuu weeydiisan karaa caddeymo uu ku habsanayo in magaca iyo shahaadada ay yihiin kuwo sax ah lana qaadan karo ama waxaa uu waydiinkaraa meelaha ay ka soo baxeen.
 - d. labo warqadood oo ay soo qoreen dad yaqaana codsadaha.
3. Haddi codsaduhu uu buuxiyo shuruudaha laga doonayo isla markaana uu Golahu ku qanaco meharadiisa iyada/asaga waxaa lagu qorayaa diiwaanka guud waxaana la siinayaa shahaadada diiwan gelinta ee ku qeexan foomka 3/2 ee lifaaqa 3-aad.
 4. Diiwaan gaar ah ayaa lagu diiwaan gelinayaa qeeybaha kala duwan ee codsadaayaasha diiwaan gelinta.

Qod 14.5.

Ruqsad-siinta Takhaatiirta Sida Gaarka ah u Shaqaysaneysa

Qod. 14.5.1.

Awood-u-Siinta Mihnad ku Shaqeynta

Qof kasta oo haysta ruqsad wuxuu xaq u yeelanayaa in uu ku shaqeysto mihnadiisa isla markaana uu ka qaado khidmad macquul ah addegyada uu u qabanayo bulshada sida: talo bixin, eegid bukaan, taakuleeyn deg deg ah iyo qiimaha daawada uu u isticmaalay shaqooyinkiisa taasoo uu soo ogolaady Guddiga Qaranka ee X/Xoolaha.

Qod. 14.5.2.

Dadka la Siin karo Ruqsadda

Dadka la siin karo soona codsan kara ruqsadda (shati) waa:

1. Takhtarka Caafimaadka Xoolaha ee diiwaan-gashan sida ku cad Qodobka 14.4.1 ee sharcigan.
2. Mar kasta oo uu Golahu ku qanaco in ay muhiim u tahay danta dadweeynaha wuxuu awoodiisa ku tala bixin kara in ruqsad la siiyo uu ku shaqeysto qof aan Soomaali ahayn ee haysta shahaadada caafimaadka xoolaha taasoo xaq u siineysa isaga/ayada in ay ka shaqaysan karto waddanka gudihiisa ayadoo la raacayo sida ku xusan qodobka 14.4.1.

Qod. 14.5.3.

Soo Codsasho Ruqsad

1. Soo codsashada ruqsada waxaa ku xiran shuruudo ay kamid yihiin:
 - a. Bixinta khidmadda la jideeyey
 - b. Iyo in uu haysto shahaadada diiwaan-gelinta
2. Ruqsaddu waxay ku caddahay Foomka 3/3, ee lifaaqa 3-aad waxaana lagu bixinayaa shuruudaha xadidaya goobta shaqada loo siiyey ruqsadda iyo waqtiga uu u xadiday Guddiga
3. Golahu wuxuu amri kara in uu joojiyo diiwaan-gelinta iyo ruqsadda markii uu helo wax is dabamarin la xariirta qaabka codsiga oo la soo codsaday diiwaan-gelin ama ruqsad-siin.

Qod. 14.6.

Ka-tiridda Diiwaanka ama baabinta Ruqsadda ee Dhakhtarka Cafimaadka Xoolaha

1. Qof kasta oo diiwaan gashan ama haysta ruqsadda haddii dembi lagu helo oo lid ku ah sharcigan markii Maamulka Xannaanda Xoolaha ama Guddiga Qaranka ee X/Xannaanada

Xoolaha ay baraan arrintaas kuna cadaado dembi waxaa haddii uu diiwan gashanaa la amrayaa diiwaan hayaha in uu ka tirtiro qofkaas diiwaanka, haddii uu ahaa takhtar haysta ruqsad waxaa laga tirtiri karaa ruqsadda. Ka saaridda shakhsiga diiwaanka guud waxay keeneysaa in laga qaado ruqsaddii horay loo siiyey.

2. Baaritaan kasta oo uu sameeyo Golahu ee la xariirta Qaybtan, qofka la baaray waxaa la siinayaa fursad lagu dhageysto asaga ama qareenkiisa.
3. Qaabka baaritaan kasta, Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu sharciyeeyo qaabkiisa baaritaaneed.
4. Muddada baaritaanka, Guddiga X/Xoolaha wuxuu amri karaa muddo lagu qorayo diiwaanka ee la xiriirta qofka la baarayo taasoo loogu sheegayo in diiwaan-gelintiisa iyo ruqsaddisa aysan ahayn kuwo shaqeynaya muddadaas.
5. Haddi horay amar looga baxshay in qof la sharciyeeyay sida uu qabo sharcigani laga saaro magaciisa diiwaanka guud ama horay looga joojiyey ruqsaddiisi, Golahu asagoo dareenkiisa raacaya ama codsi uu soo qortay qofka kiiska ku jira amaba uu sameeyo baaritaano gaar ah kadibna uu u arko in qofkaasi loo soo celiyo diiwaan-gelintiisii horay looga saaray diiwaanka ama uu u soo celiyo ruqsaddi horay looga joojiyey, xaaladahaas midkood la diiwaan geliyo khidmad la'aan ama bixin khidmad aan ka badneeyn middi diiwaan gelinta iyo ruqsad siinta ama sida uu u jideeyo Golahu.
6. Qof kasta oo aan ku qanacsaneeyn go'aanka Guddiga wuxuu cabasho u qorankaraa wasiirka wasaaradda xannaanada xoolaha haddii wasiirku ku raaco Guddiga waxaa uu go'aanka wasiirka uga qaadarkaraa racfaan maxkamadda sare oo ka gaaraysa kiiskaas go'aan Kama dambeys.

Qod. 14.7.

Diiwaan-gelinta iyo Ogolaanshaha Kushaqeysatada Mihnadda Kaaliyaha Horumarinta Xoolaha iyo Midka kal Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha.

1. Kaaliyaha Horumarinta Xoolaha iyo Kal-Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha waxay iska diiwaan-gelinayaan Golaha Qaranka ee Xannaanada Xoolaha iyadoo lagu diiwaan-gelinayo xirfadooda uu aqoonsanyahay isla markaana ogolaaday Guddigu sida ku qoran Qodobada 14.4.1, 14.4.2,
2. Kaaliyaha Horumarinta Xoolaha iyo Kal-Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha waxay xaq u yeelanayaan in ay ku shaqeeystaan mihnadooda iyadoo ku hoos shaqaynaya mas'uuliyadda Takhtar diiwaan-gashan, lehna ruqsad sida uu jideeyey Guddigu.
3. Waxay shaqadooda ku gudanayaan si waafaqsan xirfadooda, tabarkooda iyo aqoontooda farsamo oo uu aqoonsanyahay oggolyahayna Guddigu waafaqsanna xeerarka hoos imanaya sharcigan oo uu Wasiirka Xannaanada Xoolaha uu ku soo saaray Wareegto.

Qod. 15.

Xeer-hoosaaad lagu dhaqa-galiyo xeerkan

Wasiirka waxa sameyn karaa xeerhoosaaad lagu dhaqan-galinayo sharcigan si loo horumariyo caafimaadka xoolaha iyo mihnadda dadka ku shaqeeyo xifaddan iyo wax kasta oo xeerar ah iyadoo uusan u baahanin go'aano kale oo ku wajahan sii wadidda awoodda iyo howlaha caafimaadka iyo horumarinta xoolaha.

Qod. 16.

Baabi'in sharci

Waxaa la baabi'iyay sharci kasta oo ka hor imanaya ama aan la soconkarin xeerkan, hasa yeeshee wixii laga waayo xeerkan waxaa loo noqonayaa xeerkaa ka horeeyay lambarkiisu yahay 20 ee soo baxay 27/06/ 1967 iyo is badaladdii ka dambeeyay.

Qod. 17.

Dhaqan-gal

Xeerkani waxaa uu dhaqan-galayaa markuu ansixiyoo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Madaxwaynuhu saxiixo, waxaana lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

LIFAAQA 1.
CODSI DIIWAAN GALIN

Jaantuska 1/1
DIIWAN GELINTA TAKHAATIIRTA CAAFIMAADKA/ HORUMARINTA XOOLAHA,
KAALIYAHA CAAFIMAADKA/ HORUMARINTA XOOLAHA

Ku: Diiwanhayaha Guddiga Qaranka ee Xannaanada Xoolaha

Anigoo ah..... ahna

Waxaan hakaan ku codsanayaa in la I diiwaan geliyo anigoo mihnadeeydu tahay

Waxaan halkaan ku soo lifaaqayaa:

- a) Shahaadadeeyda
- b) Cadeymaha waayo aragnimadeeyda (C.V)
- c) Waraaqado caddeymo ah oo aan ka keenay laba qofood oo marqaati ah

Taariikh.....

Saxiix codsadhaha.....

Jaantuska 1/2

SHAHAADDADA DIIWAAN GELINTA

Dr./mudane/marwo.....
Waxaan ku diwaan geliyey sida uu qabo Sharciga Xoolaha....., in uu yahay
Lagu diiwaan-geliyey Xamar maanta oo ay taariikhdu tahay
Bisha..... Sanadka 20.....
Waxaa laga qaaday lacagta diiwan-gelinta oo dhan 10 Doolar.....
Saxiixa diiwaan-hayaha.....
Saxiixa gudoomiyaha-----
Fiiro gaar ah: ruqsaddu waxeey dhaceysaa, bisha.....
Maalinta..... sanadka 20.....

Jaantuska 1/3

RUQSADDA KU SHAQEYNTA MIHNADDA TAKHTAR/KAALIYE Xoolaadka

Sumad Warqada Lamb-----	taariikhda.....
Takhtar/Kaaliye.....	
waxaa loo ogolaaday in uu ku shaqeeysto mihnadda takhtar/kaaliye xoolaad sida uu qabo sharciga xoolaha asagoo qabanaya shaqooyinka gaar ahaaneed ee uu u oggolyahay sharcigani.	
Ruqsadani waxaa saldhig uu ah shuruudaha hoos ku qoran.	
Lacagta diiwaan-gelinta ee laga qaaday waa: 50 Doolar.....	
Saxiixa diiwaan hayaha	
Saxiixa gudoomiyaha.....	
Fiiro gaar ah: ruqsaddu waxeey dhaceysaa, bisha.....	
Maalinta..... sanadka 20.....	

LIFAAQA 2.
DIIWAAN-GELINTA GOOB-MIHNADEED

Jaantuska 2/1

CODSI DIIWAAN-GELIN GOOB mihnadeed

<p>Ku: Diiwaanhayaha Golaha Qaranka ee X/Xoolaha</p> <p>Cinwaankiisa.....</p> <p>.....</p> <p>Aniga/Annaga.....</p> <p>.....</p> <p>waxaan codsanayaa/codasaneeynaa in naloo diiwaangeliyo goob-mihnadeed aan ku.....----- Oo ku taala.....</p> <p>magaalada.....</p> <p>.....</p> <p>xakameynta shaqada waxey hoos imaneeysaa.....</p> <p>Farmashiiste/takhtar diiwaangashan sida ay qabaan qodobada sharciga Xannaanada Xoolaha.</p> <p>Lacagta diiwaan-gelinta Shilin Soomaali _____ oo u dhiganta 50 Doolar</p> <p>Taariikh.....</p> <p>Saxiixa codsadhaha/codsadayaasha -----</p>
--

Jaantuska 2/2

DIIWAAN-GELINTA GOOB MIHNADEED

<p>SUMAD WARQAD LAMB.....</p> <p>Goob number.....ku taal.....</p> <p>Magaalda.....waxaa lagu diiwaan-geliyey sida uu qabo sharciga xoolaha taasoo loogu talagalay in lagu fuliya -----(gadis daawo, baaris iyo latalin)</p> <p>howshaasoo uu xakameynaayo kuna ilaalinayo..... oo ah farmashiiste/takhtar diiwaan-gashan oo sharci ah.</p>	<p>TAARIKH.....</p>
---	----------------------------

Saxiixa diiwaanhayaha -----

Saxiixa gudoomiyaha-----

Fiiro gaar ah: ruqsaddu waxeey dhaceeysaa, bisha.....

Maalinta..... sanadka 20.....

LIFAAQA 3.

**DIIWAAN-GALIN IYO RUQSAD SIIN SOO DEJIN IYO IIBIN
DAAWOYINKA XOOLAHA**

Jaantuska 3/1

**CODSI DIIWAAN GELINTA IYO RUQSAD SIINTA SOO DEJINTA
DAAWOYINKA XOOLAHA**

KU: Diiwaan hayaha Golaha Qaranka ee X/Xoolaha

Cinwaan.....

Aniga/Annaga.oo ah.....

waxaan codasaneeynaa in naloo ogolaado ruqsada iibin daawoyinka xoolaha .

xakameynta daawoyinkaas oo uu noo qaabilsan yahay Dr.....oo ka diiwaan gashan guddiga

Saxiixa codsadaha.....

Taariikh -----

Jaantuska 3/2

RUQSAD IIBIN DAAWOYINKA XOOLAHA

SUMAD WARQAD LAMB.....	TAARIKH.....
Mudanayaasha kala	
ah.....	
Oo leh ku leh goob	
ganacsi..... Waxaa lagu ogolaada iibinta	
daawoyinka xoolaha qaab jumlo ama tafaariiq.	
takhtarka ee diiwaan gashan xakameynaayana shaqada	
waa.....	
.....	
Saxiixa diiwaan-hayaha -----	

Saxiixa Gudoomiyaha-----

Fiiro gaar ah: ruqsaddu waxeey dhaceysaa, bisha.....
Maalinta..... sanadka 20.....

Jaansuka 3/3

Codsi diiwaan-galin soo dejin daawo xoolaad

KU: Diiwaan hayaha Golaha Qaranka ee X/Xoolaha

Cinwaan.....

Aniga/Annaga.oo ah.....

waxaan codasaneeynaa in naloo ogolaado ruqsada soo dejin daawooyinka xoolaha .

xakameynta daawooyinkaas oo uu noo qaabilsan yahay Dr.....oo ka diiwaan gashan guddiga

Saxiixa codsadhaha..... Taarikh -----

Jaantuska 3/4

OGOLAASHO SOO DEJINTA DAAWOYINKA XOOLAHA

SUMAD WARQAD LAMB.....

TAARIKH.....

Mudanayaasha.....oo leh

..... kuna leh goob

ganacsi..... Waxaa halkaan loogu ogolaaday in ay soo dejiyaa daawooyinka xoolaha.

Saxiixa diiwaan-hayaha.....

Saxiixa gudoomiyaha-----

Fiiro gaar ah: ruqsaddu waxeey dhaceysaa, bisha..... Maalinta.....
sanadka 20.....

LIFFAQ 4.
DOORASHADA GUDOOMIYAHA GUDDIGA QARANKA EE
DHAKHAATIIRTA XANNAANADA XOOLAHA

Jaantuska 4/1

SOO MAGACABIDDA MUSHARAXA

Mgaca musharaxa oo buuxa iyo cinwaankiisa

(ku qor farta waaweyn)

.....

.....

.....

Magaca soo jeedinaya musharaxa oo buuxa iyo cinwaanka qofka

(ku qor farata waaweyn)

.....

.....

.....

Waxaan waafaqsanahay ogolahayna magacaabistayda

Saxiixa

musharaxa.....

Saxiixa soo

jeediyaha.....

Taariikh.....

Jaantuska 4/2

WARQADDA CODAYNTA

Magaca Musharaxa	Ku hor qor calaamadda X magaca musharax aad dooneeysid in aad dooratid
1	
2	
3	
4	
5	
6	
7	

Tusmo

Gogol-Dhig	1
Hordhac	3
Cutubka 1aad: Erey-bixin	4
Qodobka 1aad: Eray-bixin	4
Cutubka 2aad: Qodobo Guud	7
Qod. 2.1.1. Ujeeddooyinka	7
Qod. 2.1.2. Masuuliyadda Wasaaradda Xannaanada Xoolaha	7
Qod. 2.2. Hawlaha Caafimaadka Xoolaha ee dowliga ah (Public sector) iyo kuwa aan dowliga aheyn (Private sector)	8
Qod. 2.2.1. Hawlaha Caafimaadka Xoolaha ee dowliga ah (Public Sector) iyo kuwa aan dowliga aheyn (Private Sector)	8
Qod. 2.2.2. Waajibaadka Shaqada ee qeybta Dan Guud iyo midda dan Gaarka (the Public & Private)	8
Qod 2.3. Habraaca Hay'adaha	9
Qod. 2.3.1. Masuuliyadda Wasiirka Xannaanada Xoolaha	9
Qod.2.3.2. Awoodda soo saarida habraac shaqo sharci ah	9
Qod. 2.3.3. Waajibaadka Waaxda Caafimaadka Xoolaha	10
Qod. 2.3.4. Guddigga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xannaanada Xoolaha	11
Qod.2.3.5 Xilka Guddiga Qaranka ee Dhakhaatiirta Xoolaha	11
Qod.2.4. Diyaarinta Hindise-Sharciyeedyo iyo Qawaaniin	11
Qod.2.4.1. Awoodda diyaarinta Hindise-Sharciyeedyo iyo Qawaaniin	11
Cutubka 3aad. Warbixinta Cudarada iyo Waajibaadka Guud	11
Qod. 3.1. Waajibaadka Guud	11
Qod. 3.2. Gudbinta Warbixinta Cudurrada	12
Qod. 3.3. Gudbinta warbixinta Cudurrada ee Wadanka Gudihüisa	13
Qod. 3.4. Xadeynta iyo Qaadista Tallaabooyinka Caafimaad ee laga qaadayo Cudurrada la is-qaadsiyo oo ay warbixitoodu khasabka tahay Tilmaan xadeed	13
Qod. 3.5. Tallaabooyinka Caafimaad ee laga Qaadayo Aagga Cudurku ka jiro	13
Cutubka 4aad. Xakameynta Cudurrada ay khasabka tahay in laga warbixiyo	14
Qod. 4.1. Caddeeynta in Cudurro ay ka Jiraan Qayb ka mid ah Dalka Guduhüisa	14
Qod. 4.2. Awoodda soo saaris Amarro	14
Qod. 4.3. Baab'inta/Aasidda Raqda Neef Jirran	14
Qod. 4.4. Qalista Xoolaha Jirran	14
Qod. 4.5. Ka-takhalusidda jirka (Qalfoofta/raqda) Neefka la Qalay	15
Qod. 4.6. Awoodda Baarista Xoolaha Jirran/buka iyo oonta Xoolahaas	15
Qod 4.7. Ka hortagga Cudurka Raabiyada	15
Qod. 4.7.1. Xoolaha Buka/jirran ee la doonayo in Warbixin laga gudbiyo, lana Gooni-sooco	15
Qod. 4.7.2. Waajibaadka Saraakiiska Maamulka, Dhakhaatiirta iyo Baarayaasha Caafimaadka Xoolaha	15
Qod. 4.7.3. Awoodda Wasiirka u leeyahay in uu Caddeeyo Goob uu ka jiro Cudurka Raabiyada	16
Qod. 4.7.4. Baa'ibinta Xoolaha Qaba Cudurka Raabiyada	16
Qod. 4.7.5. Diiwan-Gelinta iyo Ruqsad-Siinta	16
Qod. 4.7.6. Laynta Xoolaha dibed-joogga ah	16
Cutubka 5aad. Xuquuqda Xoolaha	16
Qod. 5.1. Xoolaha waa in loo aqoonsadaa nafley dareen iyo damqasho leh, muhiimna ay tahay in la ilaaliyo qiyamka ay ku leeyahayiin bulshada dhexdeeda	16
Qod. 5.1.1. Dhaqanka Naxariis L'aanta ah ee Lagu Sameeyo Xoolaha	16

Qod. 5.2: Arxan-darrada Waqtiga Gowraca.....	17
Cutubka 6aad. Dhoofinta ama Soo-dejinta Xoolo iyo Wax ka-soo-baxa Xoolo	17
Qod. 6.1. Hay'adaha u Xilsaaran.....	17
Qod. 6.2. Soo-dejinta Xoolaha iyo Waxyaabaha ka-soo-baxa Xoolaha.....	17
Qod. 6.3. Dhoofinta Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa.....	18
Qod. 6.3.1. Wada-shaqeynta Hay'adaha Dawladda	18
Qod. 6.3.2. Mamnuucidda Dhoofinta Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa Xoolaha	19
Qod. 6.3.3. Oofinta baahida dalka wax loo dhoofinaaya	19
Qod. 6.3.4. Kaabayaasha Xakamaynta, fududaynta dhoofinta iyo soo-dejinta.....	19
Cutubka 7aad. Daabulidda Xoolaha iyo Waxa ka-soo-baxa Xoolaha.....	20
Qod. 7.1. Shuruudaha Guud Ahaaneed.....	20
Qod. 7.2. Ruqsadaha iyo Shahaadooyinka Xoolaha la Daabulayo.....	21
Qod 7.3. Shuruudaha loo Baahanyahay Daabulidda ka hor, Inta Daabulidda lagu guda jiro, Raridda iyo Dejinta Xoolaha.....	22
Qod. 7.3.1. Daabulidda ka hor.....	22
Qod. 7.3.2. Haynta Xoolaha inta aan la Rarin ka hor.....	22
Qod. 7.3.3. Raridda iyo Dejinta Xoolaha.....	22
Qod. 7.3.4. Waqtiga Rarka lagu Guda-jiro	23
Qod. 7.4. Talooyin u gaar ah Qaababka Daabulidda.....	23
Qod. 7.4.1. Lugeysiinta Xoolaha	23
Qod. 7.4.2. Ku-daabulidda Gaadiidka Dhulka	24
Qod. 7.4.3. Wax Ku-daabulidda Gaadiidka Badda	24
Qod. 7.4.4. Wax Ku-daabulidda Gaadiidka Cirka.....	24
Qod. 7.5. Ruqsadaha iyo shahaadooyinka Daabulidda Xoolaha.....	25
Qod. 7.6. Waxyaabaha u gaarka ah Uunta Xoolaha.....	25
Cutubka 8aad. Fayadhowrka Hilibka	25
Qod. 8.1. Meesha Loo cayimay	25
Qod. 8.2. Baarista	26
Qod. 8.3. Awooda Haynta iyo Ka-takhlusidda Raqda ama Qalfoofa Neef Dhintay	26
Qod. 8.4. Qodobka Habka Barista Hilibka	26
Cutubka 9aad. Dhakhaatiirta Xoolaha oo aan dowliga aheyn(Gaarka ah).....	26
Qod. 9.1. Waajibbaadkooda Dhakhaatiirta Xoolaha aan dowliga aheyn	26
Qod 9.2. Daaweynta Xoolaha oo ay Fuliyaan Dadka aan ahayn Dhakhaatiirta Xoolaha	27
Qod. 9.2.1. Awoodda Maamul ee Goob Adeeg Caafimaad ee Mucayin ah waxaa ka mid ah:.....	27
Qod. 9.2.2. Adeegga Daryeellaha Caafimaadka Xoolo ee ku Salaysan goob caafimaad (CBAHWs)(CAHWs)community animal health workers	27
Cutubka 10aad. Qaanuunka Daawooyinka Xoolaha iyo Wayaabaha La xiriira	28
Qod.10.1. Iibsashada iyo Qeybinta Daawooyinka Xoolaha	28
Qod. 10.2. Xeerarka soo dejintayayaasha, Qeybintayayaasha iyo iibiyaasha Dawooyinka Xoolaha.....	28
Qod. 10.2.1. Fududeynta iyo Shuruudaha Keydinta Daawooyinka Xoolaha.....	29
Qod. 10.2.3. Diiwaangelinta Ganacsatada iyo Dhismo Ganacsi oo ay Leeyihiin Dhaqaatiirta Daawooyinka Xoolaha	29
Qod. 10.2.4. Shuruudaha iibinta Daawooyinka Xoolaha ee Jumlo iyo Tafaariiq	30
Qod. 10.3. Isticmaalka Sharciga waafaqsan Daawooyinka Xoolaha.....	30
Qod. 10.3.1. Qasadka Isticmaalka.....	30
Qod. 10.4. Awooda mamnuucidda Isticmaalka Tallaalka iyo Daawooyinka	31
Cutubka 11aad. Khidmadaha, Ganaaxyada iyo Qodobo kale.....	31

Qod. 11.1. Nidaamka Khidmadaha(Lacagaha)	31
Qod. 11.1.1. Khidmadda Adeegga iyo Lacagata la qaadayo(fiiga ah).....	31
Qod. 11.2. Joojinta, Qalista ama Tuurista Neef Jirran.....	32
Qod. 11.2.1. Joojinta Neef Jirran ama aan Wanaagsaneeyn.....	32
Qod. 11.2.2. Mas'uuliyadda Milkiilaha ee Wixii Dhuma Ama ka Halaab Xoolaha iyo Oonta Xoolaha ee Lagu haayo Baaritaan	32
Qod. 11.2.3. Qalista Neef Xanuunsan	32
Qod. 11.3.4. Tuurista Raqda Neef la Qalay.....	32
Qod. 11.3. Xayirid, la Wareegid, Karantiin ama Tuurista Neef ama oon-xoolaa	32
Qod. 11.3.1. Xayiraad Xoolo	32
Qod. 11.3.2. La wareegid Xoolo	32
Qod. 11.3.3. Go'aan ka Qaadashada Neefka lala Wareegay	33
Qod 11.3.4. Xayirid, La-wareegid iyo Go'aan Ka qaadashada Oonta Xoolaha.....	33
Qod. 11.3.5. Ka-Madax-banaanida Bixinta Magdhaw	33
Qod. 11.3.6. Ka bixinta Magdhaw Ciribtirka Cudurrada Faafa.....	33
Qod. 11.4. Ganaaxyada.....	33
Cutubka 12aad. Xaaladda Degdegta ah ee Cudurrada Xoolaha iyo Maareyntooda	34
Qod. 12.1. Hay'adaha iyo Wakaaladaha:	34
Qod. 12.2. Unugga Hawlgal Xaaladda Degdegga ee Cudurrada.....	34
Qod. 12.3. Guddiga Qaranka ee Gurmada Degdegga ah ee Caafimaadka Xoolaha.....	35
Qod. 12.4. Waxqabadka Wasaaradaha Gurmada Degdegga ah ee Cudurrada Xoolaha	35
Qod. 12.5. Masuuliyadda Guddiga Qaranka Gurmada Degdegga ah ee Cudurrada Xoolaha	36
Qod. 12.6. Doorarka uu leeyahay Agaasimaha Waaxda Caafimaadka Xoolaha (CVO) Inta Lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ee Cudurrada	36
Qod. 12.7. Waajibaadka ay Leeyihiin daneeyaasha xoolaha (livestock stakeholders) inta lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ah.....	36
Cutubka 13aad. Tallaabada inta lagu Guda jiro Xaaladda Degdegga ah	37
Qod. 13.1. Tallaabada Degdegta ah ee Maamulka Qaranka ee Caafimaadka Xoolaha:.....	37
Qod. 13.2. Tallaabo Qaadidda Markii Laga Shakiyo in uu Jiro Cudur Khatar ah:.....	37
Qod. 13.3. Tallaabo Qaadista Marka uu jiro Cudur Khatar ah oo la Xaqiijiyay	38
Qod. 13.4. Tallaabada ku Aaddan Dhammaadka Barnaamijka Xaaladda Deg degga.....	38
Cutubka 14-aad. Guddiga Qaranka ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha	39
(National Veterinary Board).....	39
Qod. 14.1. Dhisidda Guddiga Qaranka ee X/Xoolaha	39
Qod. 14.1.1. Xubnaha Guddiga Qaranka ee Dhaqaatiirta X/Xoolaha.....	39
Qod. 14.1.3. Muddada Xilka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha	39
Qod. 14.1.4. Shirarka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/ Xoolaha	40
Qod. 14.1.5. Awoodaha iyo xilalka Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha	40
Qod. 14.2. Magacaabista Shir-Guddoomiyaha doorashada ee Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha	41
Qod. 14.2.1. Shuruudaha Aqooned ee laga Doonaayo qofka loo Magacaabay Shir-guddoomiyaha Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta X/Xoolaha.....	41
Qod. 14.2.2. Doorashada Gudoomiyaha Guddiga Qaranka Dhakhaatiirta Xoolaha Doorashda gudoomiyaha urur xirfadeedka Xoolaha	41
Qod. 14.3. Nidaamka Waxbarashada Xannaanada Xoolaha	42
Qod 14.4. Diiwaan-gelinta iyo Ruqsad-siinta Takhaatiirta iyo Kalkaaliyayaasha Caafimaadka iyo Horumarint Xoolaha	43
Qod. 14.4.1. Shakhsiyadka u-qalma in ay Codsadaan Diiwaan-Gelinta.....	43

Qod. 14.4.2. Codsiga Diiwaan-gelinta.....	43
Qod 14.5. Ruqsad-siinta Takhaatiirta Sida Gaarka ah u Shaqaysaneeyisa	44
Qod. 14.5.1. Awood-u-Siinta Mihnad ku Shaqeynta.....	44
Qod. 14.5.2. Dadka la Siin karo Ruqsadda	44
Qod. 14.5.3. Soo Codsasho Ruqsad	44
Qod. 14.6. Ka-tiridda Diiwaanka ama baabínta Ruqsadda ee Dhakhtarka Cafimaadka Xoolaha	44
Qod. 14.7. Diiwaan-gelinta iyo Ogolaanshaha Kushaqeysatada Mihnadda Kaaliyaha Horumarinta Xoolaha iyo Midka kal Kaaliyaha Caafimaadka Xoolaha	45
Qod. 15. Xeer-hoosaaad lagu dhaqa-galiyo xeerkan	45
Qod. 16. Baabi'in sharci.....	46
Qod. 17. Dhaqan-gal.....	46
LIFAAQA 1. CODSI DIIWAAN GALIN	47
LIFAAQA 2. DIIWAAN-GELINTA GOOB-MIHNADDEED	49
LIFAAQA 3. DIIWAAN-GALIN IYO RUQSAD SIIN SOO DEJIN IYO IIBIN DAAWOYINKA XOOLAHA	50
LIFAAQA 4. DOORASHADA GUDOOMIYAHA GUDDIGA QARANKA EE DHAKHAATIIRTA XANNAANADA XOOLAHA	52